HERITAGE INSTITUTE



# Caqabadaha Hortaagan Dibu Soo Noolaynta Ciidamada Amniga Soomaaliya

April 2021

# Tusmada


**1. Nuxurka Daraasadda** **3**

**2. Habraaaca Daraasadda** **5**

**3. Hordhaca** **5**

**4. Guudmarka Ciidamada Nabadgalyada Soomaaliya** **6**

**5. Heshiin la'aanta haldoorka siyaasadda** **9**

5.1 Khilaafka Hiiraan iyo Gedo 11
5.2 Doorka ay DFS ku leedahay amniga doorashooyinka dowlad goboleedyada 13

**6. Musuqmaasuqa iyo Maamul Xumada** **14**

6.1.Qaraabo kiilka 15
6.2 Kor uqaadista daahfurnaanta 17
6.3 Liidashada xukunka iyo xakamaynta 18
6.4 Awoodda hawlgallada 19

**7. Ku fillaansho la'aanta maalgelinta** **21**

**8. Saamaynta qaska Al-Shabaab** **23**

8.1 Cashuuraha adeegyada 24

**9. Saaxiibbada Caalamka** **26**

9.1 Erateriya: Haddaan kooye? 28
9.2 Turkiga iyo Mareykanka: Saaxiibbada ugu wanaagsan 29

**10. Gunaanad** **32**

**11. Talobixinta** **33**

# 1. Nuxurka Daraasadda

In ka badan toban sano ayey dawladihii Soomaaliya u kala danbeeyey iyo bulshada caalamku dadaal weyn ku bixinayeen sidii dib loogu soo noolayn lahaa ciidamada amniga Soomaaliya.[1] Arrintan oo qayb ka ahayd dadaallo waaweyn oo loogu jiray xasilinta dalka wixii ka danbeeyey burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya 1991. Balaayiin doollar ayaa lagu bixiyey tababarrada iyo qalabaynta kumannaan ciidan oo mallitiri, boolis iyo sirdoon isugu jira, si ay dalkooda uga xoreeyaan xoogagga xagjirka Al-Shabaab, isla markaana ay u dhaqan geliyaan sharciga. Ku dhawaad 15 sano ka dib, labadan ujeeddo midina umay fulin si buuxda, ciidamada nabadgalyada dalkuna wali waa mid aad u taag daran, si qoto dheer u kala daadsan, aadna loo siyaasadeeyey.

Ciidamada amniga Soomaaliya, ayaa markii hore loo qorsheeyey in ay masuuliyadda difaaca kala wareegaan ciidamada midowga Afrika ee nabad ilaalinta u jooga SoomaaliyaA(MISOM) , isla markaana ay lafdhabar u noqdaan ilaalinta amniga dalka dhammaadka sannadka 2021. Si akstaba ha ahaatee, sida ku xusan qorshe siyaasadeedka xasilinta dalka, ee ay dajisay dawladda Fadderaalka Soomaaliya, ayaa hadda yoolkiisa loo dhigay 2023. Qorshihii Axdiga nabadgalyada ee London 2017, oo ahaa in la helo ciidammo nabadgalyo oo "Awood leh, lala xisaabtami karo, dhaqaale loo heli karo, sida oo kale na la isla waafaqsan yahay" wali ma muuqdo. Taa badalkeeda, ciidamada nabadgalyada qaranku waxa ay wali ku tiirsan yihiin caawimooyinka ay ka helaan dibedda, sida maalgalinta, tababarrada, saanadda ciidamada iyo taageerada hawlgallada.

Xuddunta guuldarradani waa arrimo is huwan, oo ay ugu weyntahay iswaafaq la'aanta siyaasadeed ee u hormoodka siyaasiyiinta colaaaddu hareysay ee Soomaaliya, kuwaas oo ku guuldarraystay in ay maareeyaan arrimaha muhiimka u ah qaab-dhismeedka ciidamada amniga. Siyaasadaynta ciidamada amniga waxa ay noqotay mid baahsan, iyada oo ay hoggaamiyeyaasha dawladda federalka iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah federaalkuba , xoogga ay saareen amniga talisyadooda, halkii ay ka ay ka saari lahaayeen amniga qaranka. Halkii ay kala dagaallami lahaayeen al-Shabaab, lagana xoojin lahaa ku dhaqanka sharciga, waxa inta badan ciidamada amniga dalka ee kala duwan lagu qasbaa in ay fuliyaan awaamiirta cidda talada heysa, taas oo sii xoojisay kalsooni darrada ay dad badan oo Soomaaliyeed iyo saaxiibbada caalamkuba ka qabaan ciidamada amniga Soomaaliya.

1Hay'adaha Amniga Soomaaliya, waxa looga jeedaa dhammaan ciidamada dawladda oo ay ku jiraan, militeriga, booliska iyo sirdoonku

Sidaas oo kale, musuqmaasuq iyo maamul-xumo dawladeed ayaa hareeyay laamaha amniga. In kasta oo sannadihii la soo dhaafay horumar la mahadiyey laga gaarey la dagaallanka musuqmaasuqa, iyada oo meesha laga saarayo askarta beenta ah iyo in ciidamada lagu diiwaangalinayo aaladda sawirta faraha, iyo waliba in musharkooda lagu bixiyo hannaanka lacag dirista moobillada, haddana wali dhaqammadii musuqmaasuqu may dawoobin. Saraakiisha waxaa lagu dallacsiiyaa eex iyo qaraabo kiil, si ay daacadnimada uga arradaan, oo ay awoodda ugu tagrifalaan, taas oo dhaawacaysa shucuurta ciidamada nabadgalyada. Beddelaadda faraha badan ee lagu sameeyo saraakiisha sarsare ayaa khalkhalisa ciidamada amniga, taas oo wiiqda amar-qaadashada iyo xakameynta ciidamada,keentana isla xisaabtan xumo.

Dhibaatootinka dhaqaale ee joogtada ah ayaa ah caqabad kale oo xaddidaysa awood la'aanta nabadgalyada, ee ku lug leh qoridda, tababarka iyo qalabaynta ciidamada amniga. Iyada oo ay wehiliso in ay dad badani ka baxayaan ciidamada, haddana dawladda federaalka Soomaaliya waxa ay u halgameysaa in ay soo saarto xoogag ku filan, si ay u gaarto hadafkeeda ah "saaridda, haysashada iyo dhisidda". Hadal iyo dhammaan, laamaha amnigu waxa ay aad ugu tiirsan yihiin ciidammo yar oo si gaar ah u tababaran, gaar ahaan kuwa Danab ee uu Mareykanku tababaray iyo cutubyo uu Turkigu tababaray oo la yiraahdo Gorgor iyo Haramcad. Qiyaas ahaan, Danab waxa ay hoggaamisaa 80% howlgallada oo dhan, halka ay boqolkiiba boqol hoggaamiso howlgallada la dagaallanka argagixisada.

Marka la fiiriyo dhimista ciidamada AMISOM lagu samaynayo sannadaha soo socda iyo loollanka sii xoogeysanaya ee ka dhexeeya saaxiibbada caalamka, sannadaha soo socda ayey caddaanaysaa kaalinta ciidamada curdinka ah ee Soomaaliya. Barta kaliya ee ifeysa waa in aanay al-Shabaab khatar ku ahayn jiritaanka DFS, in kasta oo ay weli tahay qas iyo awood ku baahsan dalka oo dhan. Al-Shabaab waxa ay muujisay in ay xeel-dheeri iyo xeelad kaga gaashaamato duqeynta cirka ee Mareykanka iyo howlgallada dhulka. Iyaga oo ku tiirsan shabakad casri ah oo dhulka hoostiisa ku taalla, kooxdan xagjirka ahi, waxa ay isku beddeleen koox dambiyeed, waxayna uruursadaan dakhli u dhigma kan ay DFS ka hesho Muqdisho, Boosaaso iyo magaalooyinka kale ee waaweyn.

## 2. Habraaaca Daraasadda

Iyada oo laga duulayo sahan lagu soo ururiyey xogo aasaasi ah, warbixintani waxa ay ku salaysan tahay wareysiyo qaabaysan oo lala yeeshay mas'uuliyiinta xilalka sare hadda ka haya dowladda Soomaaliya iyo kuwii hore uga soo hayn jiray, kuwaas oo leh faham qotodheer oo ku saabsan laanta nabadgalyada Soomaaliya. Waxa kamid ah saddex wasiir oo hore u soo noqday wasiirka gaashaandhigga, laba wasiir oo hore u soo noqday wasiirrada amniga, laba agaasimayaal oo hore uga tirsanaa Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda (NISA), iyo saraakiil sarsare oo ka tirsan saddex wasaaradood oo kala duwan, kuwaas oo DFS u qaabilsan amniga iyo xasilinta. Saraakiishani waxa ay metelayaan jiilal kala duwan iyo aragtiyaha jira. Wareysiyada iyo su'aalaha la socdaa waxa ay dhaliyeen aragtiyo gaar ah oo saldhig u ah warbixintan. Sida oo kale, waxa aannu dibu-eegis ku samaynay shan dukumenti oo ay DFS leedahay, kuwaas oo isugu jira qorshayaasha amniga iyo qiimeynta halista ee wadajirka ah, oo ay wada sameeyeen dawladda federaalka Soomaaliya, Qaramada Midoobay iyo AMISOM. Waxa aannu sidaa oo kale dibu-eegis iyo falanqeyn ku sameynay qiimeyn madax-bannaan oo ku saabsan laamaha amniga, taas oo ay sameeyeen saaxiibbada dhow ee Soomaaliya. Ugu dambeyntiina, dibu-eegis ballaaran ayaannu ku samaynnay wax yaabihii arrintan hore looga qoray, taas oo qayb muhiim ah ka ahayd qoritaanka warbixintan.

## 3. Hordhaca

Nuxurka warbixintani waa in dib loo soo nooleeyo ciidammo nabadgalyo oo "Awood leh, lala xisaabtami karo, dhaqaale loo heli karo, sidaas oo kale na la isla waafaqsan yahay", sida uu saadaalinayo qaab-dhismeedka nabadgalyada qaranka ee la ansaxiyey 2017, kaas oo ay curyaamiyeen shan caqabadood oo ka haysta dhinaca qaab-dhismeedka. Arrinta ugu horreysa, uguna darani waa iswaafaq la'aanta ka dhex jirta hoggaamiyeyaasha siyaasadda dalka- heer federaal ilaa heer dowlad goboleed. Ciidamada nabadgalyada ee labada heer, ayaa si joogto ah ugu heellan yihiin cabbudhinta kala duwanaanta aragtiyaha siyaasadeed, taas oo keenaysa in ay kooxaha xagjirka ahi badbaadaan oo ay barwaaqobaan. Qodobka labaad ayaa ah maamul-xumada ba'an ee ku dhisan qaabka qaraabo kiilka ah iyo liidashada xukunka iyo xakameynta ciidamada. Qodobka saddexaad, ayaa ah ku fillaansho la'aanta maaliyadda, taas oo si guud u xaddideysa waaritaanka iyo ballaadhinta awoodda ciidamada nabadgalyada Soomaaliya. Tan afraadna waa sii jiritaanka awoodda al-Shabaab, oo caqabad ku ah nabadgalyada iyo xasilloonida dalka. Tan shanaad, ayaa ah doorka ay faragalinta dalalka shisheeye ku leeyihiin ciidammada amniga ee Soomaaliya, kuwaas oo leh qorsheyaal kala duwan, oo u leexinaya ciidamada amniga Soomaaliya jihooyin lid ku ah ujeeddadooda dhabta ah. Isku soo wada duuboo, arimahan ayaa shaacinaya caqabadaha qaabdhismeed ee lidka ku ah, in mustaqbalka dhaw la soo nooleeyo ciidamada nabadgalyada Soomaaliya.

# 4. Guudmarka Ciidamada Nabadgalyada Soomaaliya

> *"marka loo eego dalalka ugu nugul adduunka, oo ay Afgaanistaan kow ka tahay, Soomaaliya waa dalka labaad ee qarashka ugu badan ku bixiya laamaha nabadgalyada,taas oo ah boqollayda ugu badan miisaaniyadda dalka*

Sida lagu sheegay dibu-eegis uu sameeyay Bangiga Adduunku 2017.[2], marka loo eego dalalka ugu nugul  adduunka, oo ay Afgaanistaan kow ka tahay, Soomaaliya waa dalka labaad ee qarashka ugu badan ku bixiya laamaha nabadgalyada,taas oo ah boqollayda ugu badan miisaaniyadda dalka. Dalku waxa uu leeyahay saddex hay'adood oo amni, kuwaas oo ka amar qaata DFS.[3]

## Saddexda hay'adood ee nabadgalyada




Tan ugu weyn, uguna muhiimsani waa militariga, oo loo yaqaanno Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (CXDS). 15-kii sano ee la soo dhaafay, qiyaastii in ka badan 100,000 oo askari ayay soo tababareen isla markaana ay qalabeeyeen dalal badani.[4]  Haddana, tirada saxda ah ee ciidamada xoogga dalka Soomaaliyeed ma cadda. Mid kamid ah saraakiisha sarsare ee DFS ayaa sheegay in ciidamada mallitarigu yihiin 28,000, oo mushahar ka qaata Wasaaradda gaashaandhiga.[5]

---

2 Eeg "Sharkii London ee Soomaaliya: Heshiiskii Amniga". (2017), bogga 5, waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.gov.uk/government/publications/london-somalia-conference-2017-security-pact
3 In addition to SNA, SPF & NISA, there are other smaller branches such as the custodial corps, marine forces and air force. However, only the military, police and intelligence services are engaged in fighting al-Shabaab and are the focus of this report
4 Waraysi la la yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan DFS. (DeSember 2020).
5 Ibid.


Hase yeeshee, sarkaal kale oo ka tirsan DFS, aadna uga agdhow Wasaaradda Gaashaandhigga, ayaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ku sheegay 24,000.[6] Shirkii lagu qabtay London bishii May 2017, ee lagaga arrinsanayey arrimaha Soomaaiya. Heshiiskan waxa qayb ka ahaa Qaab-dhismeedka Ciidamanka Amniga Qaranka (NSA), oo lagu heshiiyey in DFS iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalku, ay isku raacaan in la sameeyo 18,000 oo ah Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed, iyada oo mid kasta oo ka mid ah shanta dowladood ee xubnaha ka ah federaalku  ay ku biirin doonaan 3,000 oo askari. Ciidamada gaarka ah, kuwa cirka iyo kuwa baddu, kumay jirin jaantuskan.[7]

Waxa ay fikraddu ahayd in dib loo dhiso ciidan qaran oo tiro yar, tayo badan, loona dhanyahay, kaas oo hoos u dhigi kara, kana adkaan kara al-Shabaab. Arrintan oo la is kula qaatay heshiisyo badan oo Soomaaliya ka dhacay, haddana waligeed ma dhaqan galin, sababtuna waa loollan siyaasadeed oo ka dhex jirta dowladda federaalka  iyo dawladaha xubnaha ka ah  federaalka.[8]

Hay'adda labaad ee ku xigtaa, waa Ciidanka Booliska  Soomaaliyeed. Sida millatariga oo kale, awooddooda ciidan way kooban tahay. AMISOM waxa ay tababartay ku dhowaad 5,000 oo  boolis  ah intii u dhaxeysay 2009 ilaa 2015.[9]  Si kastaba ha ahaatee, sarkaal sare oo ka tirsan DFS ayaa sheegay in ay 11,000 oo boolis  ahi ku jiraan mushahar bixinta Wasaaradda Amniga Gudaha (MoIS). Inta badan saraakiishani waxa ay ka shaqeeyaan magaalada Muqdisho iyo nawaaxigeeda, maadaama dawlad kasta  oo xubin ka ah federaalku ay leedahay ciidan boolis  oo u gaar ah. Heshiiskii amniga ee London, waxa uu ku baaqayey in la dhiso 32,000 oo booliis ah, kuwaas oo ay tahay in  loo kala qaybiyo heer federaalka iyo heer maamul-goboleed.[10] Boqortooyada Ingiriiska, oo ah xubinta qalinka u heysa samafalka Soomaaliya ee Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay, iyo dalalka kale ayaa mashruucan aad u riixayay,  iyada oo la isla qaatay inay  magaalooyinka dhawaan la xoreeyey ee Soomaaliya mudnaanta xasilinta ka leeyihiin difaacidda cadowga  dibadda. [11]

Ciidamada ugu yar Soomaaliya, waa kuwa Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka (NISA), taas oo ah hay'ad sirdoon oo qarsoodi ah "lana shaqeysa qeybaha kala duwan ee amniga. Howlgallada ay fuliso waxa kamid ah kuwa boolis ka  iyo militariga".[12]

### Miisaaniyadda hay'adda sirdoonka (NISA)




6 Waraysi la la yeeshay sarkaal sare oo ka dirsan ciidamada difaaca DFS. (December 2020).
7 Eeg "Sharkii London ee Soomaaliya: Heshiiskii Amniga". (2017), bogga 5, waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.gov.uk/government/publications/london-somalia-conference-2017-security-pact
8 See "London Conference on Somalia: Security Pact". (2017), page 5, Accessed at: https://www.gov.uk/government/publications/london-somalia-conference-2017-security-pact
9 Eeg Dibu-eegista Kharashaadka dawladda ee ku baxa Amniga iyo Cadaaladda Soomaaliya." Warbixinta Bangiga Adduunka, ibid, bogga 40.
10 Eeg, Heshiiskii Amniga, ibid.
11 Siyaasiyiin badan oo Soomaaliyeed,oo uu ka mid yahay Raysalwasaaruhu, ayaa ka deyriyey heshiiskii London oo ahaa mid ay ku urursanayeen dalalka deriska ah oo ay ka go'an tahay in ay Soomaaliya ka dhigaan mid itaal-daran oo kala qaybsan.
12 Eeg "Dibu-eegista Kharashaadka dawladda ee ku baxa Amniga iyo Cadaaladda Soomaaliya." Warbixin uu diyaariyey Bangiga Adduunku, ibid, bogga 41.

Sida la sheegay ciidamada hay'addani waxaa lagu qiyaasaa 4,500, waxa aanay helaan qiyaastii boqolkiiba shan - taas oo ah lacag aad u sarreeysa marka loo eego ciidamada kale.[13] Si ka duwan labada ciidan ee kale, sharcinimada NISA su'aal baa ka taagan. Kalitaliskii Siyaad Barre ayaa digreeto madaxweyne ku aasaasay, waxa aanu si weyn ugu adeegsaday inuu ku cabburiyo dadka ka soo horjeeda. Hay'addani ma laha sharciga aasaasiga ah, taas oo lagama maarmaan u ah inay u shaqeyso sidii hay'ad sharci ah oo ka jirta Soomaaliya, wixii ka danbeeyey dagaallada.[14]

Madaxda dalka ayaa siyaasad ahaan uga faa'iideysta arrintan, waxa aanay hay'addan si joogto ah ugu adeegsadaan in ay ku cabburiyaan cidda ka soo horjeedda; maaddaama ay adag tahay in laga dacweeyo hay'addan maxakamadaha sharciga.[15] Bishii Diiseembar 2017, saraakiil ka socda NISA ayaa weeraray guriga hoggaamiye mucaarad ah oo ku yaalla Muqdisho, Cabdiraxmaan Cabdishakuur, waxa aanay halkaa ku dileen shan ka mid ah ilaaladiisa. Sidaa oo kalena waxa ay dhaawaceen Cabdiraxmaan Cabdishakuur, iyaga oo xiray kuna eedeeyay khiyaano qaran, inkasta oo ay markii dambe maxakamaddu sii daysay.[16] Agaasime hore oo NISA ahaa ayaa yiri, "Madaxweynayaasha Soomaaliya waxa ay u arkaan in ay NISA tahay qayb ka tirsan Villa Soomaaliya iyo seef la gula dagaallamo dadka nidaamkooda ka soo horjeeda.[17] Agaasimeyaashii ugu dambeeyay ee NISA, ayaa lagu yaqaannay in ay yihiin siyaasiyiin marka la barbardhigo khibraddda ay u lahaayeen arrimaha nabadgalyada, inta badanna waxa ay xulafo dhow la lahaayeen madaxweynaha kursiga ku fadhiya.[18]

*"Ciidamada nabadgalyada ee Soomaaliya, waxa ay leeyihiin taariikh dheer oo ku taxan in xoogga la saaro amniga taliska, halkii ahmiyadda laga siin lahaa amniga qaranka, iyo in la iska indhatiro ku dhaqanka sharciga, iyada oo laga doorbidayo waxa loogu yeero "sharciga taliska*

Ciidamada nabadgalyada ee Soomaaliya, waxa ay leeyihiin taariikh dheer oo ku taxan in xoogga la saaro amniga taliska, halkii ahmiyadda laga siin lahaa amniga qaranka, iyo in la iska indhatiro ku dhaqanka sharciga, iyada oo laga doorbidayo waxa loogu yeero "sharciga taliska".[19] Khuburada badankoodu waxa ay qoreen, in wixii ka danbeeyey jabkii Soomaaliya ka soo gaaray dagaalkii 1977 ee lala galay Itoobiya iyo isku daygii afgambigii xigay ee 1978, in uu Jeneraal Siyaad Barre isku soo ururiyey awoodaha, isaga oo taageerayaashiisa ku badiyey laamaha amniga, si ay u ilaaliyaan taliskiisa. Colin Robinson, oo ah taariikhyahan caan ah, ayaa sheegay, "in qaraabo-kiilkii iyo takrifalkii darajooyinka sarsare, ee muddada dheer la waday ay dumiyeen haybadda hay'adda ciidanka millitariga ee qaranka Soomaaliyeed."[20] Waxa uu intaas raaciyey, 20 sano ka dib, qabiilaysigii oo kale ayey aramidiisu dib u soo aartay.[21]

---

13 Ibid.
14 Warasyi la la yeeshay agaasime hore oo NISA ahaa. (Desember 2020).
15 Ibid.
16 Eeg, tusaale, " Raysalwasaarihii hore waxa uu raalligalin ka bixiyey weerar ay NISA ku qaadday guriga hoggaamiye mucaa rad ahaa". Garoowe Online (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/for-mer-pm-apologizes-over-nisa-attack-in-opposition-leaders- house
17 Warasyi la la yeeshay agaasime hore oo NISA ahaa. (Desember 2020).
18 Agaasimaha hadda ee NISA , Fahad Yaasin, waa qofka ugu dhaw madaxweyne Farmaajo. Agaasimeyaashii hore waxaa ka mid ahaa:Cabdullaahi Sanbalooshe, Gen. Gaafow, Gen. Tuuryare iyo Ahmed Fiqi. Dhammaantoodna waa siyaasiyiinta maanta ugu cadcad.
19 Waraysi lala yeeshay wasiir hore u soo ahaan jiray wasiirka difaaca Soomaaliya 1 (December 2020).
20 Robinson, C. "Dibu-eegis ku saabsan soo bixitaankii iyo dhicitaankii ciidamada amniga Soomaaliya". (2016). Falaqaynta difaaca iyo amniga. 32:3, bogga 241.
21 Ibid, bogga 243.

# 5. Heshiin la'aanta haldoorka siyaasadda

Si guul looga gaaro dibu habaynta laamaha amniga, khubaradu waxa ay qabaan in bulshooyinka colaadaha ka soo doogay ay u baahan yihiin "abuurka heshiis u dhexeeya dhinacyada is haya oo ay gacan ka gaysanayaan beesha caalamku iyo hannaan horseedaya in aanay dawladdu ku soo ururin gacanta kalitaliska ama aan dibu habaynta ka dhigaynin mid ku dhow in xukun maroorsigu dammaanad helo."[22] Soomaaliya, dedaallada ku saabsan dhismaha qaranku waa kuwo muhiim u ah dib u soo noolaynta ciidammo ammaan oo daneeyayaasha oo dhammi raalli ka yihiin. Qodobada ugu mudan baa ah dib u heshiisiin siyaasadeed iyo in la dhammaystiro nidaamka federaalka ee fadhiid ka ah,[23] awoodaha iyo khayraadka oo la wadaago." Dibuheshiisiinta dhabta ah, waxa shardi u ah heshiis loo dhan yahay oo dib loogu dhiso laamaha amniga," ayaa uu yiri wasiirkii hore ee amniga, mudane Cabdirisaaq Cumar.[24]

Qiimeyn dhawaan lagu sameeyay Howlgalka Tababarka Midowga Yurub (EUTM) ee Soomaaliya, ayaa lagu xusay in dib uheshiisiin la'aanta siyaasadeed ay caqabad ku tahay dhismaha hay'ado amni oo takhasusaad leh.[25] Inta badan, jilayaasha siyaasadda ee maxalliga ahi, waxa ay aad ula yaabban yihiin hay'ado amni oo sidan u awood badan, oo la mid ah kuwii kalitaliska militariga, kaas oo raba in hal qabiil ama koox yari bulshada inteeda kale dusha ka qabsato. Kalsooni darradu waa mid qotodheer marka laga dabqaato dibu-eegista uu sameeyey Bangiga Adduunku, taas oo uu ku sheegay in "dhinacyadu ka cagajiidayaan in ay 'ka tanaasulaan' hubka ay isku ilaaliyaan' inta ay jirto xasilooni darrada siyaasadeed."[26] Qiimeyn wadajir ah oo ay 2019 wada sameeyeen DFS, AMISOM iyo Qaramada Midoobay ayaa lagu ogaaday in "ismariwaagii siyaasadeed uu sii daba-dheeraaday", kaas oo u dhexeeyay DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka , isla markaana uu caqabad ku yahay dibu dhiska ciidamada amniga qaranka.[27]

> *"Waxyaabihii ugu darraa ee ay keentay colaadda u dhaxaysa haldoorka siyaasaddu waxa ka mid ah in xal joogto ah loo waayo arrimaha ka taagan dastuurka kumeelgaarka ah*

Waxyaabihii ugu darraa ee ay keentay colaadda u dhaxaysa haldoorka siyaasaddu waxa ka mid ah in xal joogto ah loo waayo arrimaha ka taagan dastuurka kumeelgaarka ah. Waxa jira ugu yaraan 15 qodob oo wali iska hor imanaya, kuwaas oo u baahan in si aqoomaysan la isu waafajiyo."[28] Ma jiraan wax caddaynaya sida loo wadaagayo masuuliyadda amniga iyo sida ay u kala leeyihiin heerarka federaalka iyo maamul-goboleedyadu," ayuu yiri, agaasimihii hore ee hay'adda NISA.[29]

---

22 Beyene, A. "Dibuhabeynta lidka ku ah Waaxda Amniga Soomaaliya. "LSE. (2020),bogga 4, waxa aad ka heli kartaa halkan: http://eprints.lse.ac.uk/103683/1/Dribssa_Beyene_security_sector_reform_paradox_somalia_published.pdf
23 Beyene, A. "Dibuhabeynta lidka ku ah Waaxda Amniga Soomaaliya. "LSE. (2020),bogga 4, waxa aad ka heli kartaa halkan: http://www.heritageinstitute.org/dysfunctional-federalism-how-political-division-constitutional- ambiguity-and-a-unitary-mindset-thwart-equitable-distribution-of-power-in-somalia/
24 Waraysi la la yeeshay wasiirkii hore ee amniga Cabdirisaaq Cumar (Desember 2020).
25 Williams, P. iyo Cali, H "Howlgalka tababarka Midowga Yurub ee Soomaaliya: Qiimayn uu sameeyey". (2020). SIPRI, bogga 14, waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.sipri.org/publications/2020/sipri-background- papers/european-union-training-mission-somalia-assessment.
26 Eeg "Dibu-eegista Kharashaadka dawladda ee ku baxa Amniga iyo Cadaaladda Soomaaliya ."(2017).Bangiga adduunka,bogga 28. Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/26030?show=full
27 "Qiimeyn-haliseed wada jir" (JTA) Warbixin si sir ah loola wadaagay HIPS. (2019). FGS/AMISOM/UN, bogga 5,
28 Ibid, page
29 Interview with former NISA director, ibid.

Heshiiskii Amniga ee London lagu gaaray 2017, waxa uu qeexayey qaab kumeel gaar ah oo DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah ay iskaga kaashanayaan ciidamada amniga. Marka wax kale laga yimaaddo, waxa ay hindiseen Golaha Amniga Qaranka (NSC) oo ka kooban madaxweynayaasha DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah, oo ay weheliyaan wasaaradaha muhiimka ah ee federaalku. Nidaamkiisa siyaasadeed iyo kiisa istiraatiijiyadeedba, waxa Golaha Amniga Qaranka, loogu talagalay in uu hago[30] xafiisyada amniga gobolka,kuwaas oo loo sameeyay hirgelinta Qaab-dhismeedka amniga qaranka.[31] Shaqaale rayid ah ayaa dawlad-goboleedyada looga shaqaaleysiiyey xafiiska amniga, si ay u taageeraan Qorshaha Kalaguurka Soomaaliya (STP), kaas oo ku baaqaya in si nidaamsan loo mideeyo ciidamada DFS iyo kuwa dawlad goboleedyada, si ay Soomaaliya ula wareegto waajibaadkeeda amni ee ay hayso AMISOM dhammaadka 2021.[32]

*“ dawladda Soomaaliya si joogto ah ugu guuldarraysatay in ay arrimaha nabadgalyada kala shaqayso dawladaha xubnaha ka ah federaalka, taas oo qayb muhiim ah ka ahayd ballanqaaddadeedii ka soo baxay axdigii nabadgalada ee London 2017*

Si kastaba ha ahaatee, khubaradu waxa ay rumaysan yihiin in “isku duubni oo lagu guuraa… ku xiran tahay in aan loo kala harin mashruuca dhismaha federaalka. Horumarku waxa uu noqonayaa mid aan sii ridnayn haddii aan kalsooni lagu dhisin hannaanka ballaaran ee federaalnimada.[33] Tan iyo heshiiskii amniga ee London, xirir ka u dhaxeeya dawladda federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka badankooda waxa hareeyay khilaaf siyaasadeed, kaas oo sii adkeeyey in ay labada dhinac wada shaqeeyaan. Warbixin uu soo saaray kormeeraha guud ee wasaaradda difaaca Maraykanka ee Pentegon-ku ayaa lagu sheegay in ay “ dawladda Soomaaliya si joogto ah ugu guuldarraysatay in ay arrimaha nabadgalyada kala shaqayso dawladaha xubnaha ka ah federaalka , taas oo qayb muhiim ah ka ahayd ballanqaaddadeedii ka soo baxay axdigii nabadgalada ee London 2017.”[34]

Dibu heshiisiinta bulsheed, ayaa iyaduna ah arrin lafdhabar u ah sababta ay dad badan oo Soomaaliyeed kaga soo horjeedaan ciidammo amni oo awood leh, kuwaas oo ay maamulaan siyaasiyiin Muqdisho fadhiyaa. Marar badan, arrintani, “waxa ay salka ku haysaa xusuusihii xanuunka badnaa ee uu kalitaliyihiii militariga ahaa u adeegsaday laamaha amniga, si loogu cabburiyo dadka ka soo horjeeda.” ayaa uu yiri, wasiir hore oo gaashaandhigga ahaan jiray.[35] Wasiir kale, oo isna gaashaandhigga soo qabtay ayaa sheegay in “kalsoonidi aad uga burburtay bulshada Soomaaliyeed, sidaa darteedna ay jirto baahi loo qabo in kalsoonida dib loo soo dhiso, gaar ahaan darafyada si loo dhiso ciidammo loo dhan yahay oo isku-dhafan.”[36]

---

30 Mid ka mid ah waajibaadka ugu muhiimsan ee Golaha Amniga Qaranka waxa uu ahaa in ay isku raacaan magacaabista taliyayaasha iyo goobaha ay ku kala yaallaan saldhigyada ciidamada ee dalku, taas oo ay ahayd in lagu saleeyo qaab-dhismeedka federaalka.
31 Eeg, Heshiiskii Amniga ee London, ibid.
32 JTA, bogga 7. Ibid.
33 Keating, M. and Abshir, S. “Siyaasadda Amniga ee Soomaaliya”. Xarunta Iskaashiga Caalamiga.(2018), bogga 7, Waxa aad ka heli kartaa halkan:: https://cic.nyu.edu/sites/default/files/politics_of_security_in_somalia_2018_final_0.pdf
34 Eeg“Hoggaanka Kormeeraha Guud ee Golaha Koongareeska Mareykanka ee Bariga Afrika iyo Waqooyiga Afrika iyo Galbeed-ka Afrika. ”” (2020), bogga 25, waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.dodig.mil/Reports/Lead- Inspector-General-Reports/Article/2427451/lead-inspector-general-for-east-africa-and-north-and-west-africa- counterterrori/
35 Waraysi la la yeeshay wasiir hore u ahaa wasiirka difaaca Soomaaliya 1. (Desember 2020).
36 Waraysi la la yeeshay wasiir hore u ahaa wasiirka difaaca Soomaaliya 2. (2020).

## 5.1 Khilaafka Hiiraan iyo Gedo

Si loo helo sababta ay kalsooni darradu ugu dhex faaftay dadka Soomaaliyeed, marka ay noqoto adeegyo nabadgalyo oo awood leh, saraakiil badan oo hadda jooga iyo qaar hore, oo warbixintan lagu wareystay ayaa soo qaatay khilaafka ka socda Gedo (Jubbaland), kaas oo sii xoogeysanayay tan iyo dabayaaqadii 2019 iyo colaadda ka taagan Hiiraan ( Hirshabeelle), oo iyaduna qarxisay mawjad cusub oo khilaaf ah bishii Noofambar 2020. Inkasta oo ay labadan khilaaf asal ahaan u kala duwan yihiin, haddana faragalinta ciidamada dawladda federaalka Soomaaliya ee markasta taagan ayaa sawir cad ka bixinaya sababta ay siyaasadaynta ciidamada amnigu caqabad weyn ugu tahay in la dhiso ciidan qaran oo heshiis lagu yahay.

Arrinta Gedo, dawladda federaalka Soomaaliya waxa ay cutubyo ka tirsan ciidamada qaranka Soomaaliyeed, ee Gorgor ( Milliteri) iyo Haramcad (Boolis ), oo Turkigu soo tababaray u dirtay Gedo, kaddib doorashadii madaxtinimada Jubbaland ee dhacday 2019, taas oo uu si lagu muransan yahay ugu guulaystay Axmed Madoobe.[37]

Guuto ka mid ah ciidamada qalabka sida ayaa loo diray Gedo, si ay meesha uga saaraan maamulkii deegaanka ee daacadda u ahaa madaxweyne Madoobe, laguna beddelo qaar daacad u ah madaxweynaha DFS, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo. Ciidamada ay dawladda federaalku u daadguraysay Gedo waxa si kulul u canbaareeyay saaxiibbada caalamka, sida Mareykanka. Rodney Hunter, oo ahaa xiriiriyaha siyaasadda ee Mareykanka u qaabilsan Qaramada Midoobay, ayaa yiri, “Khilaafka siyaasadeed ee ka dhashay ciidamada ay dawladda federaalku Gedo gaysay waa wax aan la aqbali Karin.” Arrinkani, waxa uu dhacay intii lagu guda jiray shirkii Golaha Amniga ee bishii Febraayo.[38] Tani waxa ay ahayd canaan dhif iyo naadir ah oo ay DFS u soo jeediso mid ka mid ah xulafadeeda muhiimka ah isla markaana ka tarjumeysa gows-qabsiga caalamiga ah ee sii kordhaya, kaas oo ku saabsan siyaasadeynta ciidamada amniga.

Qeyb kale oo ka mid ah dhibaatada Gedo ayaa ah dagaal laba beelood oo waaweyn ka dhex holcaya, Ogaadeen iyo Marreexaan. Waa labada beelood ee ay ka soo kala jeedaan Madaxweynaha DFS Farmaajo, oo ah Marreexaan iyo madaxweynaha dawlad-goboleedka Jubaland oo ah Ogaadeen.

---

37 Eeg Xassan, A., “Hoggaamiyaha Soomaaliya ee Jubbaland, oo khilaaf kula jira Muqdisho, ayaa ku guuleystay Muddo Cusub.” Reuters. (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.reuters.com/article/us-somalia- politics/president-of-somali-state-of-jubbaland-re-elected-in-divisive-vote-idUSKCN1VC15B?il=0

38 Eeg “Faalladii Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay warbixin kooban oo ku saabsan xaaladda Soomaaliya.” (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://usun.usmission.gov/remarks-at-a-un-security-council-briefing-on-the-situation-in-somalia-5/

"Colaadda ka taagan Gedo waxay ka tarjumaysaa loollan siyaasadeed oo ku salaysan in siyaasaddii qaranka dib loogu celiyey kacdoonno qabiil, kuwaas oo ah isha ugu weyn xasillooni-darrada ka jirta Soomaaliya," ayay qortay hey'adda International Crisis Group.[39] Sida muuqata, khilaafkii Gedo ayay ka dhalatay dhibaatada ugu weyn ee soo wajahday doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha ee loo qorsheeyay inay qabsoomaan dabayaaqadii 2020 iyo horraanta 2021.[40]

### Dhacdada la yaabka leh ee Cabdirashid Janan

Cabdirashid Janan, oo hore u soo ahaan jiray Wasiirka Amniga ee Jubbaland, ayaa udub dhexaad u ahaa arrinta khilaafka Gedo. Sannado badan ayuu Janan ahaa hoggaamiye ku xooggan dhowr magaalo oo ku yaalla gobolka Gedo, isaga oo xidhiidh la lahaa dalalka Kenya iyo Itoobiya. Kaddib markii uu ku biiray maamulka Jubbaland ee Kismaayo saldhiggiisu yahay, madaxweynaha Jubbaland Axmed Madoobe ayaa u wakiishay in uu ka shaqeeyo amniga gobolka Gedo, maaddaama uu Janan xidhiidh qotodheer la lahaa bulshada deegaankaas. Kaddib doorashadii madaxtooyada ee  uu khilaafku ka dhashay 2019, Janan waxaa magaalada Muqdisho ku xirtay DFS bishii Sebteember 2019, iyada oo ku eedaysay in uu galay faldanbiyeedyo ka dhan ah xuquuqal insaanka. Ururrada xuquuqal insaanka sida Amnesty International and Human Rights Watch, ayaa aad u soo dhaweeyay qabashadiisa.[41]

Bishii Jannaayo 2021, ayuu C/rashiid Janan ka baxsaday xabsigii dawladda federaalka ee Muqdisho, arrintan waji gabax ku noqotay xukuumadda Farmaajo.[42] Isla markii uu galay xuduudda Soomaali-Kenya, waxa gobolka Gedo dib uga soo cusboonaaday xiisado hor leh. Kaddib baxsashadiisii, DFS waxa ay ku eedeysay in ciidamada Janan ee ay taageerto Kenya, oo la safan Jubbaland, inay soo weerareen ciidammadii dawladda federaalka ee joogay magaalo xuduudeedda Beled Xaawo, taas oo sababtay khasaare badan.[43]

Laba bilood ka dib, Maarso 2021, ayey dawladda federaalku shaacisay in uu Janan isu soo dhiibay dawladda, oo uu ka soo goostay dawlad goboleedka Jubbaland.[44] Horraantii April 2021, ayuu xeer ilaaliyaha guud ee dawladda faderaalku laalay dhammaan eedaymihii loo haystay Janan.[45] Isbeddelkan kadiska ah ee Janan, oo ku dhacay si lama filaan ah, ayaa  muujinaya nuglaanta iyo siyaasadaynta  nidaamka ciidamada amniga Soomaaliya. Toddobaadyo gudahood, Janan waxa uu iska beddelay danbiilihii la cayrsanayey waxa aanu noqday  xulufo dawladda Federaalka garab kula ah khilaafka Gedo.

Dhinaca kale,  dhibaatada Hiiraan, waxa ay ka dhalatay doorashadii madaxweynaha Hirshabeelle ee dhacday November 2020. Madaxweyne ku xigeenkii hore, Cali Guudlaawe, ayaa madaxweyne  loogu doortay tartan  ay dad badani u arkeen in loo sallaxay. Waxa uu helay 86 cod, iyada oo ay codeeyeen 99  xildhibaan oo maamulka Hirshabeelle ahi.[46]

---

39 Eeg "Joojinta dhibaatada Koonfurta Soomaaliya." ICG warbixin kooban 158. (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://d2071andvip0wj.cloudfront.net/b158-standoff-in-southern-somalia.pdf

40 Mussa, Y. "Xaaladda Soomaaliya: Caqabadaha Doorashooyinka iyo Amni-darrada sii kordheysa." ACCORD. (2021). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.accord.org.za/analysis/the-state-of- somalia-electoral-impasse-and-growing-insecurity/

41 Eeg, Tusaalahan, "Soomaaliya: Xidhidda Wasiirka Amniga ee Jubaland waa qaylo dhaan ay dhibbanayaashu caddaalad ku raadinayan ." (2019). Amnesty International. Waxa aad ka helai kartaa halkan: https://www.amnesty.org/en/latest/news/2019/09/somalia-arrest-of-jubaland-security-minister-must-yield- justice-for-victims/

42Eeg "In haldoorradu xabsiyada ka dhacaan waxa ay wiiqeysaa Halganka ay Soomaaliya ugu jirto Cadaalada." (2020). Human Rights Watch. Waxa aad ka helai kartaa halkan: https://www.hrw.org/news/2020/03/24/high- profile-jailbreak-undermines-somalias-fight-justice

43Eeg "Soomaaliya waxa ay tiri, 11 qof ayaa la dilay, 100 qofna waxaa lagu qabtay iska horimaadyo qaraar oo ka dhacay meel u dhow magaalo xuduudda ku taalla." (2021). Xinhua. Waxa aad ka heli kartaa halkan: http://www.xinhuanet.com/english/africa/2021-01/26/c_139697059.htm

44 Dhaysane, M. " Somalia: Wasiir la raadinayey oo isa soo dhiibay." (2021). Anadolu. Waxa aad ka helai kartaa halkan: https://www.aa.com.tr/en/africa/somalia-wanted-fugitive-minister-surrenders/2187196

45Eeg " Soomaaliya ayaa hoos u dhigeysa dhammaan kiisaska ka dhanka ah Wasiirkii hore oo lagu eedeeyay dambiyo culus." (2021). Garowe Online. Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/somali-govt-drops-all-cases-against-ex-minister-accused-of- serious-crime

46Eeg, Tusaale haan , "Musharrax,' Villa Soomaaliya, ka yimi ayaa ku guulaystay doorashadii Hirshabeelle". Garoowe Online. (2020). axa aad ka heli kartaa halkan: https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/villa- somalia-candidates-win-in-hirshabelle-election

> **“**
> *Khilaafka Hiiraan “waxa uu shaaca ka qaadayaa laba wajiilenimada DFS: Dawladnimada Jubaland, waxa si bareer ah u kala furfurtay DFS, iyada oo arrimo siyaasadeed oo caddaan ah u adeegsatay ciidamada qaranka Soomaaliyeed, halka ay ka taageeraysay in dowlad-goboleedka Hirshabeelle uu gaaro ujeeddooyin doorasho oo yoolkoodu gaaban tahay*

Arrinta khilaafku hareeyay ayaa salka ku heysa awood qaybsiga u dhaxeeyay laba beelood, oo ah kuwa ugu xooggan Hirshabeelle, waxayna kala yihiin beesha Abgaal oo uu ku abtirsado Guudlaawe iyo beesha Xawaadle oo uu ka soo jeedo madaxweynihii ka horreeyey. Markii la sameeyey dawlad goboleedkan 2016-dii, heshiis is-afgarasho oo u dhaxeeya labada beelood ayaa lagu ansixiyey in beel la siiyo caasimadda (Jawhar), beesha kalena la siiyo madaxweynaha. Beesha Xawaadle ayaa dareensan in ilmaadeerradood Abgaal ay jebiyeen heshiiskaas oo ay isku qaateen labadii jago, iyaga oo aan wax tixgelin ah iyaga siinnin. Taasina waa sababta ay in badan oo ka mid ah haldoorkooda siyaasaddu u taageerayaan waxa ay u arkaan kacdoon sharci ah oo ka socda Hiiraan, iyada oo la shaaciyey ujeeddada ah in ay ka go'ayso gobolka.[47]

Si xaaladda loo dejiyo, magaalada Beledweyne oo xuddun u ahayd kacdoonka, ayey DFS u dirtay saraakiil sare oo uu ka mid yahay wasiirka arrimaha gudaha ee hadda. Laakiin si ka duwan sida Gedo, DFS waxa ay taageeraysay madaxweynaha dawlad goboleedka, Guudlaawe, falkaas oo lid ku ah wixii ay dawladda federaalku ka aaminsanayd dhaqdhaqaaq fallaago ah.[48] Khilaafka Hiiraan “waxa uu shaaca ka qaadayaa laba wajiilenimada DFS: Dawladnimada Jubaland, waxa si bareer ah u kala furfurtay DFS, iyada oo arrimo siyaasadeed oo caddaan ah u adeegsatay ciidamada qaranka Soomaaliyeed, halka ay ka taageeraysay in dowlad-goboleedka Hirshabeelle uu gaaro ujeeddooyin doorasho oo yoolkoodu gaaban tahay,” ayaa uu yiri, wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray.[49]

## 5.2 Doorka ay DFS ku leedahay amniga doorashooyinka dowlad goboleedyada

Dhowrkii sano ee la soo dhaafey, DFS waxa ay cutubyo ka tirsan ciidamada amniga geysay dhammaan dowlad goboleedyada xubnaha ka ah federaalka, marka laga reebo Puntland, xilligan oo ahaa intii lagu gudo jiray doorashooyinka maxalliga ah. Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle, ayey DFS madaxeynayaal uga dhigtay saaxiibbadeeda siyaasadda, iyada oo adeegsanaysa ciidamada amniga ee saaxibbada caalamku u tababareen, una qalabeeyeen in lagu la dagaallamo al-Shabaab, si uu dalku u xasilo, sharciguna uga dhaqangalo.[50] Saddexdaa gobolba, DFS waxa ay ciidamda u adeegsatay in ay ku cabsi galiso cid kasta oo ay u aragto in aanay la jaanqaadi karin qorshaha siyaasadeed ee xukumaddeeda.

---

47 Wasiirkii hore ee waxbarashada, C/laahi Goodax iyo agaasimihii hore ee NISA C /laahi Sanbalooshe, ayey labaduba si cad u taageereen kacdoonka ka socda Hiiraan, waxayna ku eedeeyeen DFS in ay u adeegsanayso ciidamada XDS caburinta cabashooyinka sharciga ah..
48 Waraysi la la yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan DFS, ibid.
49 Waraysi la la yeeshay wasiir hore gaashaandhig 2, ibid.
50 Iyada oo faahfaahsan oo ku saabsan waxqabadyadan, Eeg, tusaalahan, “Warbixinta Xaaladda Soomaaliy, 2019”. Ibid.

Mararka qaar, ciidamada AMISOM ayaa DFS ka caawinayay musharraxa ay xulatay.[51] Jubbaland waa gobolka kaliya ee ay DFS ciidamo geysay, si ay saameyn ugu yeelato doorashada deegaanka, ugu dambeynna waa ay ku fashilantay. Taas waxaa gabi ahaanba u sabab ah taageerada adag ee ay Kenya u hayso madaxweynaha hadda xilka haya, madaxweyne Madoobe, oo xiriir qabiil oo qotodheer la leh siyaasiyiinta Soomaali-Kenyanka ah.[52]

Ayaan darro, "ficillada noocan ahi waxa ay sii xoojiyeen aaminaadda dadka Soomaaliyeed ee ah in ciidamadeenna amnigu yihiin hub aan qarsoodi ahayn oo ay adeegsato cidda Villa Soomaaliya deggani," ayaa uu yiri sarkaal sare oo hore uga tirsanaan jiray DFS.[53] Qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo xubno badan oo mucaaradka ka mid ah, ayaa qaba in ciidamada amnigu noqdeen malleeyshiyaad Farmaajo daacad u ah, halkii ay ahayd in ay ka noqdaan ciidammo qaran. Tani waxa ay keentay: sharaf dhac ku yimid adeegyada amniga, waxa aanay uga sii dartay kala qaybsanaanta bulshada iyo is afgaranwaaga u dhaxeeya haldoorka dalka.[54]

## 6. Musuqmaasuqa iyo Maamul Xumada

> *"Soomaaliya waxa ka maqan "seeska aasaasiga ah ee qaab-dhismeedka ciidamada amniga qaranka, iskaba daa in ay yeelato siyaasad ama nidaam ay ku hawlgalaan, oo la jaanqaadaya barnaamijyada (taakulooyinka) caalamiga ahe"*

Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan ciidamada amniga Soomaaliya, ayaa ah maamul xumada hogaamiyeyaashooda siyaasadeed. Laga bilaabo beddelaadaha isdabajoogga ah ee taliyeyaasha sarsare, oo ku salaysan sababo qof jeclaysi ama arrimo xisbi, ilaa laga gaaro musuqmaasuqa iyo ku guuldarraysiga xarumo gaar ah iyo takhasusaad kala duwan oo loo sameeyo noocyada ciidamada amniga—dhammaan dawladihii kala dambeeyay waxa ay ku guuldaraysteen in ay gaaraan bartilmaameedyadooda. Sida uu sheegay Paul Williams, Soomaaliya waxa ka maqan "seeska aasaasiga ah ee qaab-dhismeedka ciidamada amniga qaranka, iskaba daa in ay yeelato siyaasad ama nidaam ay ku hawlgalaan, oo la jaanqaadaya barnaamijyada(taakulooyinka) caalamiga ahe." [55]

Sida ay xaqiiqadu tahay, lama la'a tilmaameyaal dastuur iyo qorsheyaal istiraatiijiyadeed oo cadcad. Qodobka 127 ee dastuurka kumeelgaarka ah, oo aan mugdi ku jirin ayaa sheegaya dhexdhexaadnimada ciidamada nabadgalyada iyo waajibaadka ka saaran ilaalinta dastuurka iyo ku dhaqanka sharciga.[56]

---

51 Sheikh, A. and Omar, F. "Mogadishu-Backed Candidate Wins Test-Case Regional Election." Reuters. (2018). Accessed at: https://www.reuters.com/article/us-somalia-politics-idUSKBN1OI1QX
52 See, for example, "Ending the Dangerous Standoff...", ICG, ibid.
53 Wareysi lala yeeshay sarkaal hore oo DFS ka tirsanaa. (2020).
54Arrintan oo faahfaahsan kaga bogo, "Mashruuca Gorgortanka ee haldoorka iyo Mashruucyada Siyaasadda Siyaasadeed: Daraasadda Xaaladda Soomaaliya" by Prof. Ken Menkhaus. UK Stabilization Unit. (2018). waxa aad ka heli kartaa halkan:
55 Williams, P. "Dhisidda Ciidamada Xoogga dalka Soommaaliyeed: Qaab-dhismeedka guuldarrada: 2008-2018". (2020) Wargayska daraasaadka istaraatiijiga ah. 43:3, bogga 378.
56 Eeg qodobka 127 ee dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya.

> Qorshaha Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya hirgalintiisu "si xun ayey jidka uga lunsan tahay

Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, DFS waxa ay soo saartay qorsheyaal wanaagsan, sida Istaraatiijiyadda Amniga Qaranka (NSS) iyo Qorshaha Kala-guurka ah ee Soomaaliya (STP), oo ay labadaba ujeeddadoodu tahay in la dhiso ciidammo "awood leh, dhaqaale loo heli karo, lala xisaabtami karo, oo la isla waafaqsan yahay", [57] Qorshaha Kala-guurka ah ee Soomaaliya, waxa uu cayimay in dhammaadka sannadka 2023, ay ku eegtahay xilliga ay Soomaaliya masuuliyadda nabadgalyada kala wareegayso AMISOM. Nasiib darrose, taasi uma muuqato bartilmaameed macquul ah. Sida uu kormeeraha guud ee Pentagon-ku xusay, Qorshaha Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya hirgalintiisu "si xun ayey jidka uga lunsan tahay."[58]

Bilo yar ka hor, ayay DFS, Qorshihii Kumeelgaarka ahaa ee Soomaaliya oo dibu-eegis lagu sameeyay la wadaagtay saaxiibbadeeda caalamka, taas oo uu amray Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay. Saaxibbada Soomaaliya, waxa ay hoosta ka xarriiqeen in dowladda federaalku dejiso qorshe cusub oo leh bartilmaameedyo la gaari karo. Laakiin Taliska Mareykanka ee Afrika (AFRICOM), oo dusha kala socda, ciidamadiisa ka jooga Soomaaliya oo lagu qiyaaso 700 oo askari, ayaa Qorsha Kala-guurka ah ee dibu-eegista lagu sameeyay ku qeexay, "mid yoolal badan" iyo "wax la iska qoray oo lid ku ah qorshe la fulin karo".[59] Saaxiibbada caalamku, waxa ay DFS ku boorriyeen in ay dibu-eegis ku samayso oo ay ka dhigto mid "waaqici ah" oo la jaanqaadaya awoodaha dawladda Soomaaliya.[60]

## 6.1 Qaraabo kiilka

Inta badan Hoggaamiyeyaasha siyaasadda Soomaaliya ayaa aamminsan in ujeeddada ciidamada amnigu tahay in ay wax kasta oo taliskooda ka hor yimaadda iskaga difaacaan. Dhammaan dadkii aannu ku waraysannay warbixintan ayaa qiray in qaraabo kiilku yahay masiibada ku habsatay bixinta darajada iyo faylasha dawladda. Dibu-eegis uu sameeyay Howlgalka Tababarrada ee Midowga Yurub, ayaa lagu ogaaday in "howlgalkan… ay soo wajaheen dhibaatooyin uu kala kulmay qaar ka mid ah Soomaalida, kuwaas oo doonaya in ay horumariyaan qabiilkooda iyaga oo awrkooda ku kacsanaya qabiilooyinka kale."[61] Wasiir hore, u soo noqday wasiirka wasaarada amniga ayaa yiri, "Qaraabo kiilku aad ayuu ugu dhex faafay ciidamada amniga, gaar ahaan dalacsiinta saraakiisha, kuwaas oo lagu abaalmariyo guulwadayntooda, balse aan lagu abaalmarinnin waxqabadkooda."[62]

57Qabyo qoraalka Qorshaha kumeelgaarka ah ee Soomaaliya ee dibu-eegista lagu sameeyay, oo ay si qarsoodi ah u heshay HIPS. (202). bogga 10.
58 Eeg "Kormeeraha guud..." ibid, bogga 19.
59 Ibid, bogga 20.
60 Ibid.
61 Eeg "Hawlgalka tababarrada Midowga Yurub ee Soomaaliya..." ibid, bogga 14.
62 Waraysi laga qaaday wasiirkii hore ee amniga cabdirisaaq Cumar, ibid.

Tani waxa ay abuureysaa cirib xumo, keenaysa in ay dhammaan saraakiishu culeyska saaraan sidii ay dallacsiin uga raadsan lahaayeen dadka qabiilkooda ah ee fadhiya xafiisyada sarsare, sidan waxa sheegay mid kamid ah saraakiisha DFS." Saraakiisha da' yarta ahi, waxa ay wakhti badan galiyaan u ololeynta siyaasiyiinta sidii ay u heli lahaayeen darajo sare, iyada oo isbeddel kasta oo taliye, wasiir, raysalwasaare ama madaxweyne, ay ku ku dallacaan saraakiil cusubi, kuwaas oo loo dallacsiiyo si loo abuuro isu-dheellitirnaanta qabiillada - tanina waa dhabar jab, "ayaa uu yiri wasiirku.[63]

Dawladda federaalka Soomaaliya, ayaa isku dayaysa in ay xalliso dhibaatadan. Sannadkii 2020, golaha wasiirradu waxa ay ansixiyeen qorshe siyaasadeed cusub oo ku salaysan sida loo xakamaynayo rabitaanka dallacaadaha aan sharciga aheyn ee ka dhex jira ciidamada amniga, sida uu sheegay sarkaal sare oo ka tirsan DFS. Sarkaalkani, waxa uu intaas ku daray, "haddii la hirgaliyo, [siyaasaddan] in ay saraakiishu helayaan magacaabis iyo dallacsiin caddaalad ah."[64] Saraakiisha militariga ee ruug-caddaaga ahi, waxa ay qirayaan in qaraabo-kiilku aanu ahayn dhibaato dabadheeraatay oo kaliya, balse uu foolxumo ku yahay anshaxa ciidamada nabadgalyada. General Abdulqadir Diini, oo ah wasiirkii hore ee gaashaandhiga, ahna nin bulshada sumcad ku dhex leh, horeyna u soo noqday taliyaha ciidamada difaaca, ayaa wax laga xumaado ku tilmaamay, waxa uu ugu yeeray "kala furfuridda nidaamka Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed," kaas oo ay ku kacayaan hoggaamiyeyaasha siyaasaddu, iyaga oo leh ujeeddooyin aad u gaaban. "Marnaba ciidan qaran laguma dhisi karo eex iyo qaraabo kiil," ayaa uu yiri.[65]

Maaddaama uu dalku galay xilli doorasho, khubaradu waxa ay ka walwalayaan in ay dalacsiinta saraakiishu sare u kaci doonto, iyada oo ay hoggaamiyeyaasha siyaasaddu isku dayayaan in ay cod ku kasbadaan. "Xilliga doorashooyinku, waa xilliga dallacsiinta," ayaa uu yiri, wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray, kaas oo sheegay in uu madaxweynihii hore si joogto ah u dalacsiin jiray saraakiil aan mutaysannin. Sida oo kale, howlgalka tababarka Midowga Yurub waxa uu xusay in "Beddelaadda faraha badan ee lagu sameeyo saraakiisha sarsare ee ciimada qaranku" ay saamayn ku yeelatay isku xirnaanshaha qorsheyaashii loo gudbiyey.[66] Qaar ka mid ah saaxiibbada caalamka ayaa si dhow ula socda ifafaalaha arrintan. Safaaradda Mareykanka ee Muqdisho ayaa xustay in "ololaha doorashadu kiciyey xaraaradda siyaasadda, iyo in horumarka laga sameeyay dib-uhabeynta laamaha nabadgalyadu, ay hadda u muuqdaan qaar gaabis ah, oo xitaa dibu-eegis lagu samayn doono sannadka soo socda."[67]

63 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo ka tirsan DFS, ibid.
64 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo ka tirsangaashaandhigga DFS , ibid.
65 Waraysi laga qaaday Gen. Cabdulqaadir Dini, Wasiir hore oo gaashaandhig.
66Eeg "Hawlgalka tababarrada Midowga Yurub ee Soomaaliya..." ibid, bogga 14.
67 See "Kormeeraha guud", ibid, bogga 25.

## 6.2 Kor uqaadista daahfurnaanta

Bishii Diisembar 2017, markii ay musuqmaasuq awgii dowladda Mareykanku u hakisay maalgalinta ciidanka Qaranka Soomaaliyeed,[68] DFS waxa ay bilowday dedaallo dibuhabeyn ah oo aad loo mahadiyey, kuwaas oo ay uga gollahayd in ay dib ugu kasbato taageerada Maraykanka. Waxaana la qaaday tallaabooyin wax ku ool ah, si looga takhaluso "askarta caaglaha ah" ee qaadatay kaalintii Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed, iyada oo loo marayo nidaamka diiwaangelinta sawirka faraha, kaas oo la soo gabagabeeyay bishii Maarso 2019.[69] Xogta kaydka ee lagu diiwaangaliyey ciidamada faraha laga qaaday ayaa ugu dambeyntii soo saartay 16,000 oo kaliya "askarta dhabta ah", waxaana ku baxay 13 milyan oo doollar, sida uu sheegay sarkaal sare oo ka tirsan DFS.[70] Sarkaalka ayaa intaa ku daray in ay DFS tan iyo xilligaas ku soo kordhisay Ciidamada Qaranka 8,000 oo askari, taas oo ka dhigeysa awoodda ciidan ee hadda jirta 24,000 oo askari.

> *Diiwaangelinta faraha ciidamada iyo diiwaangalinta mushahar lagu bixiyo nidaamka moobillada, iyo waliba hirgelinta hannaan tartan oo ku salaysan heshiisyada qandaraasyada saadka, ayaa gacan ka gaystay wax ka qabashada arrimaha musuqmaasuqa iyo isla xisaabtanka*

Kuwa ugu muhiimsan saaxiibbada caalamka, ayaa soo dhaweeyay ololaha ka dhanka ah qawlaysatada Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed. Diiwaangelinta faraha ciidamada iyo diiwaangalinta mushahar lagu bixiyo nidaamka moobillada, iyo waliba hirgelinta hannaan tartan oo ku salaysan heshiisyada qandaraasyada saadka, ayaa gacan ka gaystay wax ka qabashada arrimaha musuqmaasuqa iyo isla xisaabtanka. Kormeerayaasha Soomaaliya iyo kuwa caalamka, ayaa hadda awooda in ay hubiyaan tirada askarta iyo waqtiga mushaharka la siiyo," ayaa uu yiri kormeeraha guud ee Pentagon-ku.[71] Bishii Sibteember 2019, ayaa uu madaxweynaha Soomaaliya saxeexay sharci muhiim u ah la dagaallanka musuqmaasuqa, kaas oo loogu talagalay in si nidaamsan loo gu la dagaallamo musuqmaasuqa ka dhex jira dowladda, oo ay ku jiraan ciidamada amingu.[72]

Sidaas oo ay tahay, khubaro tiro badan oo lagu wareystay warbixintan ayaa iftiimiyay in ay diiwaangalinta farahu aad u yaraysay masuqmaasuqa, balse aanay ka wada takhalusin, gaar ahaanna aafada qaraabo-kiilka. Wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray ayaa caddeeyay in "ilaa iyo inta ay xukunka iyo taliska ciidanku ku saleysan tahay xulufada qabiilka, aanay dallacsiintuna ku saleysnaan doonin kala mudnaanta, balse ay ku salaysnaan doonto daacad u noqoshada hoggaamiyeyaasha siyaasadda. Markaa waa xaq in la yiraahdo musuqmaasuqu wali waa uu ka sii dhex jiraa ciidamada Qaranka Soomaliya."[73] Sarkaal sare oo ka tirsan DFS ayaa sheegay in qandaraasyada lagu taageero ciidamada, si joogto ah loogu abaalmarin jiray ganacsatada xiriir la leh madaxweyne Farmaajo iyo raysalwasaarihii hore Xasan Cali Khayrre markii uu xafiiska joogay.[74]

---

68 Houreld, K. "Mareykanka oo Joojiyay Kaalmadii uu Siinayay Ciidamada Milatariga Soomaaliya ee Dhibaateysan". Reuters. (2017). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.reuters.com/article/us-somalia-military-exclusive- idUSKBN1E81XF
69 Eeg "JTA", ibid, bogga 5.
70 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo ka tirsan gaashaandhiga DFS , ibid.
71 See "Kormeere guud..." ibid,bogga 24.
72 Dhaysane, M. "Madaxweynayaasha Soomaaliya ayaa Saxeexay Hindise Sharciyeedka La Dagaalanka Musuq Maasuqa." Anadolu Agency. (2019). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.aa.com.tr/en/africa/somali- president-signs-anti-corruption-bill-into-law/1590257
73Waraysi laga qaaday wasiir gaashaandhig oo hore 1, ibid.
74 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo DFS ka tirsan, ibid.

## 6.3 Liidashada xukunka iyo xakamaynta

Marka la tixraaco Qorshaha Kumeelgaarka Soomaaliya ee dibuhabaynta lagu sameeyey, guusha ay gaareen ciidamada amniga Soomaaliya waxa lagu qeexay mid “saaraya, haysanaya, oo dhisaya.”[75]

### Qorshaha ku meelgaarka ah ee Soomaaliya




*“Hawlgallada ay fuliyaan ciidamada nabadgalyada Soomaaliya waxa ay wali ku tiirsan yihiin taageerada beesha caalamka, iyada oo aan wali Al-Shabaab laga riixin kaalinteedii, taas oo aanay ciidamada nabadgalyada ee Soomaaliya si madax-bannaan u xakameyn karin khatartooda”*

Si kale haddii aynnu u dhigno, ciidamadu waa in ay awood u leeyihiin saaridda Al-Shabaab, sii haysashada dhulka ay ka qabsadaan-muddo dheer, iyo in ay bulshada deegaanka ka caawiyaan, sidii ay u dhisan lahaayeen maamul suga nabadgalyada deegaankaas. Ku dhawaad 15 sano ka dib, oo tababar, waxbarasho iyo maalgashi aan tiro lahayn lagu sameeyay ciidamada nabadgalyada Soomaaliya, weli awood uma laha in ay ujeeddooyinkaas kaligood xaqiijiyaan.” Ciidamada nabadgalyada Soomaaliya wali may gaarin yoolal badan oo ku saabsan awoodaha hawlgallada,’ sidan waxa lagu sheegay warbixin uu Kormeeraha Pentagon-ku u gudbiyey golaha wakiilada ee Maraykanka. “Hawlgallada ay fuliyaan ciidamada nabadgalyada Soomaaliya waxa ay wali ku tiirsan yihiin taageerada beesha caalamka, iyada oo aan wali Al-Shabaab laga riixin kaalinteedii, taas oo aanay ciidamada nabadgalyada ee Soomaaliya si madax-bannaan u xakameyn karin khatartooda.”[76] Ayaa uu intaas ku daray.

*Qiyaastii waxa dalka yaalla 750,000 oo hubka noocyadiisa kala duwan ah*

Caqabadahaasi, waxa ay si aan kala go’ lahayn ugu xiran yihiin maamul-xumada oo noqotay halis ku dhex faaftay nidaamka oo dhan, taas oo siyaabo kala duwan u muuqata. Nidaamka maaraynta hubka ayaa tusaale wanaagsan u ah. DFS waxa ay heshaa tababarro iyo ilo-dhaqaale oo aad u badan, taas oo looga baahnaa in ay tirin karto, diiwaan gelin karto, lana socon karto hubka dalka yaalla. Qiyaastii waxa dalka yaalla 750,000 oo hubka noocyadiisa kala duwan ah.[77]

---


75 Eeg “Dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya ee dibu-eegista lagu sameeyay”, ibid, bogga 13.
76 Eeg “Kormeeraha guud...” ibid, bogga 18.
77 Eeg “Dibu-eegista Kharashaadka dawladda ee ku baxa Amniga iyo Cadaaladda”, ibid, bogga 29.

Sidaa darteed, maareynta hubka iyo rasaastu aad ayey muhiim u tahay. Sida ay qiratay, DFS weli may soo saarin nidaamka maaraynta hubka iyo rasaasta. Maqnaanshaha nidaamka diiwaangelinta hubka qaranka, oo ay ka mid tahay xarun qaran oo dhexe oo wax ku diiwaangalisa hannaanka elektaroonikada ama kaydka macluumaadka, oo sahlaya duubista iyo la socoshada dhammaan wareejinta hubka gudaha ee u kala gooshaya unugyada iyo shaqsiyaadka, ayaa weli ah kaalin ku bannaan nidaamka maamulka, sidan waxa lagu sheegay qiimayn haliseed saddex-geesood ah oo ay wada sameeyeen, Soomaaliya, Qaramada Midoobay iyo AMISOM.[78]

## 6.4 Awoodda hawlgallada

Marka la eego awoodda howlgallada, hawlgal milateriga oo dhawaan ka dhacay Shabeellaha Hoose, ayaa shaaca ka qaaday caqabadaha halista ku ah ciidamada amniga Soomaaliya. Kan loogu magac daray "Howlgalka Badbaado 1", halkudheggiisu waxa uu ahaa in xuduudaha al-Shabaab " la qabsado, oo la haysto".

## Hawlgalka Badbaado




78Eeg "JTA", ibid, page 7.

May ahayn oo kaliya in la soo xoreeyo Shabeellaha Hoose, balse waxa ay ahayd in la adkeeyo amniga Muqdisho, si loo wiiqo qorsheyaasha Al-Shabaab iyo fulinta weerarradeeda argaggixiso ee lagu bartilmaameedsanayo magaalada Muqdisho".[79] Ilaa 8,300 askari oo ka tirsan ciidamada amniga Soomaaliya iyo 600 oo ka tirsan ciidamada gaarka ah ee Danab ayaa howlgalka fuliyay, iyaga oo gacan ka helaya AMISOM iyo waliba ciidamada Mareykanka ee saldhigga ku leh agagaarka saldhiggii ciidanka cirka ee Ballidoogle.[80]

Howlgalkan ayaa ku guuleystay in lagu xoreeyo magaalooyinka Sabiid, Bariirre, Awdheegle, Jannaale iyo Ceel-Salini. Marka laga reebo Ceel-Salini, afarta magaalo ee kale waxa ay leeyihiin buundooyin ka soo gudba Webiga Shabeelle kana yimaadda Muqdisho. Buundooyinkani waxa ay ka mid ahaayeen marinnada waaweyn ay ka gudbaan safarrada A-Shabaab, sida oo kale Al-Shabaab waxa ay u adeegsan jirtay in ay ka soo tallaabiso walxaha qarxa ee ka yimaadda xarumaha waaweyn ee wax soo saarkeeda, kuwaas oo ay ku leeyihiin Shabeellada Hoose. Xeeldheerayaasha ayaa rumeysan in mid ka mid ah buundooyinkaas laga soo tallaabiyey gaarigii walxaha qarxa laga soo buuxiyay (VBIED) ee loo adeegsaday weerarkii bishii Oktoobar 2017 ka dhacay magaalada Muqdisho, kaas oo ay ku naf waayeen in ka badan 500 oo qof.[81] Muhiimaddu waa in ay ciidamada qaranka Soomaliya, magaalo kasta ka samaystaan saldhig ciidan oo ay ka hawlgalaan. DFS, oo ay weheliyaan mas'uuliyiinta dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed, ayaa bilaabay hawlo xasilineed oo badan, kuwaas oo loo marayo dib-u-heshiisiin maxalli ah iyo dhisidda maamullo maxalli ah.[82]

Horraantii April 2021, ayay dagaalyahannada Al-Shabaab weerar culus dib ugu soo qaadeen si ay u qabsadaan labada magaalo ee Bariire iyo Awdheegle oo ka mid ah afarti magaalo oo ay haysatay DFS. Guusha dagaalkaas oo u muuqday weeraro khasaare badan dhaliyey ayaa waxa wada sheegtay DFS iyo dagaalyahannada Al-Shabaab. Saraakiil ka tirsan dowladda ayaa u xaqiijiyay warbaahinta dilka in ka badan 70 ka tirsan dableydii al-Shabaab ka tirsaneyd oo soo qaadday weerarka, laakiin waxa ay qirteen in kooxda xagjirka ahi ay muddo kooban soo galeen tuulada istiraatiijiga ah ee Bariirre. DFS ayaa waxa ay sheegtay in ciidamadeedu ugu dambeyntii ay dib u la wareegeen.[83] Ilaa iminka oo warbixintan la qorayo, ma cadda xaaladda ay magaaladu ku sugantahay. Si kastaba ha ahaatee, in ay al-Shabaab awood u yeelato soo galitaanka ugu yaraan mid ka mid ah magaalooyinkii laga xoreeyay 18 bilood ka hor ayaa dhalisay su'aalo ku saabsan istiraatiijiyadda guud ee "qabsashada iyo haysashada" hawlgalka. Aragti ahaan, dawladda federaalka Soomaaliya waxaa ay aheyd in ay awood u yeelato haysashada magaalooyinkaas yar yar, maaddaama oo ay saddex meeloodow meel ciidamadeeda u qoondaysay in ay iskaga difaacdo weerarrada xagjirka.

---

79 Xasan, X "Xasilinta Shabeellaha Hoose: Casharradii laga bartay Badbaado 1". Warbixinta waxaa diyaariyey wasaarada arrimaha gudaha DFS iyo UNSOM,bogga 5.
80 "Kormeeraha guud..." ibid,bogga 21.
81 Eeg "JTA", ibid,bogga 4.
82 Eeg "Shabeellaha Hoose...", ibid.
83 Haruun Macruuf,. "Al-Shabaab ayaa Weerartay Saldhigyada Milatariga ee Koonfurta Soomaaliya." (2021). War laga sii daayeyVOA. Waxaa aad ka heli kartaa halkan: https://www.voanews.com/africa/al-shabab-attacks-military-bases-southern-somalia

> *Si taas ku lid ah, dawladda federaalka Soomaaliya waxa ay adeegsatay aqoonsiga qabiilka si ay u soo xulato askarta ay u dirayso furimaha hawlgallada, iyada oo cudurdaar ka dhiganaysa in sababta ku kalliftay arrintaas ay tahay  in ay dhinto khilaafaadka ka dhex oogan qabiilooyinka degaannadaas*

### Howlgalka Badbaado 1

Siyaabo badan dartood, Howlgalka Badbaado-1 waxaa sheegaya ku saabsan kakanaanta howlgallada ka dhanka ah argagixisada Soomaaliya. DFS oo ay weheliyaan AMISOM iyo saaxiibbada kale, ayaa ay muddo bilo ah ku qaadatay qorshaynta hawlgalkani. Inta badan qorshahani waxa uu diiradda saarayey arrimaha xasilloonida ee loo baahan yahay xorriyadda ka dib. Si taas ku lid ah, dawladda federaalka  Soomaaliya waxa ay adeegsatay  aqoonsiga qabiilka si ay u soo xulato askarta ay u dirayso furimaha  hawlgallada, iyada oo cudurdaar ka dhiganaysa in sababta ku kalliftay arrintaas ay tahay  in ay dhinto  khilaafaadka ka dhex oogan qabiilooyinka degaannadaas.[84] "Hannaankan laga baaraandegay ayaa ka duwan kuwii ka horreeyey, oo ay bulshooyinku dareemeen in ciidamada amniga Soomaaliya badankoodu ay ka soo jeedaan beesha wadday qulquladda joogtada ah ee dhalisay khilaafka iyo qalalaasaha" ayaa uu qoray la-taliye loo shaqaalaysiiyey in uu dibu-eegis ku sameeyo howlgalka.[85]

Arrintan waxa dhibsaday saraakiil badan oo aannu ku waraysannay warbixintan. Wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray, ayaa wax laga xumaado ku sifeeyey "tallaabooyinka aan ka fiirsiga lahayn ee la qaaday iyo in qabyaaladda lagu dhex laaqay ciidamada amniga - waa cudurkii horseeday in ay ciidamadu burburaan tobannaan sano ka hor."[86] Sarkaal sare oo ka tirsan DFS, lana shaqeeya laamaha amniga ayaa sheegay in howlgalka Badbaado 1 " uu si caddaan ah ugu kala qaybiyey Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed jifooyin beeleedyo, kuwaas oo ay awooddoodu tahay in ay kaliya xasiliyaan xaafadaha qabiilladooda, halkaas oo ay ku leeyihiin  xiriirro  qoys oo qoto-dheer.[87]

Marka fahankeeda loo dhabbogalo, DFS waxa ay u muuqataa in ay damacsan tahay in ay dhaqanka noocan ah ku sii waddo howlgallada mustaqbalka. Sida ku cad warbixin ay soo saartay, ayaa sheegaysa in "baahida loo qabo in la dhawro xasaasiyadda ku jirta qaab-dhismeedka qabiilka" ay muhiimadda ugu weyn ku leh xasilinta.[88]

## 7. Ku fillaansho la'aanta maalgelinta

> *Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan dibudhiska awoodda ciidamada amniga Soomaaliya, ayaa ah ku fillaansho la'aanta Maalgelinta*

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan dibudhiska awoodda ciidamada amniga Soomaaliya, ayaa ah ku fillaansho la'aanta Maalgelinta.

### Miisaaniyadda nabadgalyada




84 Beelaha Biyomaal iyo Habar Gidir ayaa sannado badan ku dagaallamayay qeybo ka mid ah Shabeellaha Hoose. Bishii Sebtember 2020, waxa ay kala saxiixeen heshiis nabadeed. Eeg "Dibuheshiisiinta Marka:UNSOM. (2020) , halkan ka eeg: https://somalia.un.org/en/91955-reconciliation-marka-foes-turned-friends-recall-road-peace
85 Eeg "Shabeellaha Hoose...", ibid, bogga 13.
86 Waraysi laga qaaday wasiir hore oo gaashaandhig 1, ibid.
87 Waraysii laga qaaday sarkaal sare oo federaal ah, ibid.
88 Eeg "Shabeellaha Hoose ...", ibid, bogga 16.

In kasta oo ay DFS ku bixiso amniga in ka badan boqolkiiba konton miisaaniyaddeeda, haddana dhaqaalaha ugu badani waxa uu ku baxaa kabka mushaharka laamaha amniga.[89] Miisaaniyadda loo baahan yahay in lagu qoro, lagu tababaro, laguna qalabeeyo ciidammo amni oo takhasusaad leh ayaa aad uga ballaaran awoodda dakhliga ee ay DFS hadda leedahay. Daraasad dhawaan la sameeyay ayaa lagu ogaaday in "ay wali jirto dhaqaale yaraani" taas oo dhibaato ku ah "laamaha amniga.[90] Lacag yaraanta joogtada ahi waxa ay daaha ka faydday cirib xumada ay leedahay in aanay had iyo goor adeegyada amnigu awood u lahayn in ay gutaan waajibaadkooda, taas oo badanaa abuurta kansho ay Al-Shabaab uga faa'iidaysataan firaaqadaas Sarkaal sare oo ka tirsan DFS, aqoonna u leh maalgelinta laamaha amniga ayaa yiri, "dhaqaale la'aan ayaa [wiiqaysa] in ay ciidanku muddada-dheer joogteeyaan xasiloonida." [91]

Saameynta ay leedahay dhaqaale yaraantu waxa si weyn looga dareemayaa qaadashada ciidamada, sida: Awoodda joogtada ah ee ciidamada cusub lagu qaato, lagu tababaro, laguna qalabeeyo, iyo arrintaasi saammi-galka ay la leedahay xaddiga ciidamada ee shaqada ka taga. Qiimayn haliseed wada jir ah ayaa lagu ogaaday in "guud ahaan laga gaabiyey in ciidammo la qoro, tababar ku haboonna la siiyo, walibana lagu negeeyo Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed, si loo dhimo ciidamada AMISOM, loona kala fudaydiyo culayskooda," dhibtu waxa ay ka taagan tahay in aan la soo saarin ciidammo Soomaaliyeed oo beddela kuwa AMISOM, waana arrin aan la dhayalsan karin. [92] Qadashada ciidanku waa arrin muhiim ah, maxaa yeelay xaddiga ka baxayaa ciidamada amniga Soomaaliya ayaa si aan maaquul ahayn aad u sarreeya. Sababtaas waxa qayb ka ah "mushahar yaraanta iyo wakhtiga bixinta mushaharka oo aan cayinnayn," sida ku xusan Qorshaha Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya ee dib loo eegay.[93] Ka tagitaanka iyo niyad jabka askarta waxa sababay daryeel la'aanta caafimaad, ee ku timaadda marka ay ciidamadu soo dhaawacmaan. Inta badan, howlaha noocan ah daryeelka xooggiisu waxa uu ku dhacaa qoysaska askariga dhaawacmay, maaddaama ay taageerada dowladdu markiiba ku dhammaato daaweynta adeegga degdegga ah," ayaa uu ku calaacalay wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray.[94]

Sida ku xusan Qorsha Kumeelgaarka Soomaaliya ee cusub, waxa ay DFS rajeyneysaa in ay ka gudubto caqabaddan, iyada oo kor u qaadeysa shaqaalaysiinta ciidamada, muhiimaddana siinaysa negayntooda. Laakiin qorshahan waxa ka dhiman faahfaahin gaar ah oo ku saabsan sida ay mas'uuliyiintu ku gaadhayaan hiraalkoodan, kaas oo la sheegay in uu yahay hawl u baahan dhaqaale badan, oo cabsi badan.

89 Eeg "SJPER", ibid, bogga 55.
90 See "JTA", ibid, bogga 5.
91 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo ka tirsan wasaaradada gaashaandhiga DFS, ibid.
92 Eeg "JTA", ibid, bogga 24.
93 Eeg"Oorshaha kumeelgaarka ah ee dibu habaynta lagu sameeyay", ibid, page 24.
94 Waraysi laga qaaday wasiir hore oo gaashaan dhig 2, ibid.

“

*dowladda Soomaaliya waxa ay si joogto ah ula daalaadhacaysaa dhaqaalaha hubka, gawaarida, iyo aaladaha isgaarsiinta ee lagu qalabaynayo ciidamadii hore, kuwa cusub ee dhowaan la tababaray iyo waliba boolis ka*

Kor u kaca dhibaatooyinka dhaqaale ee joogtada ah ayaa ah in ay DFS ay si weyn ugu tiirsan tahay saaxiibada caalamka, ma aha oo kaliya dhaqaalaha hawlgallada balse waxa ay xataa kaga tiirsantahay dhaqaalaha saanadda ciidanka. Sida uu sheegay kormeeraha guud ee Pentagon-ku, ““dowladda Soomaaliya waxa ay si joogto ah ula daalaadhacaysaa dhaqaalaha hubka, gawaarida, iyo aaladaha isgaarsiinta ee lagu qalabaynayo ciidamadii hore, kuwa cusub ee dhowaan la tababaray iyo waliba boolis ka .”[95] In kasta oo la kaydiyay lacag aad u tiro badan, taas oo ka dhalatay dibuhabeynihii lagu guuleystay sannadihii la soo dhaafay, haddana “DFS si fudud uma awooddo in ay u qoondeyso maalgelin dheeraad ah kharashka ku baxaya laamaha amniga, iyada oo la fiirinayo miisaaniyadda qaranka oo aad u yar isla markaana diiradda saareysa bixinta mushaaraadka, ayaa uu yiri, wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray, kaas oo u ololeeya in la kordhiyo kharashka ku baxa saanadda ciidamada.[96]

Saraakiisha DFS ayaa sheegay in qaar ka mid ah saaxibbada Soomaaliya ee caalamku, ay ka faa’iidaystaan itaal darradan,, iyaga oo caawimada qalabkooda u adeegsada arrimo siyaasadeed. laba mudane oo hore, u soo ahaan jiray wasiirrada gaashaandhigga, ayaa sheegay in dalalka Carabta iyo Afrikaanku ay sii kordhiyeen xidhiidhka siyaasadda iyo diblomaasiyadda, mar laga wada hadlayey waxtarkooda. “In kasta oo aan si toos ah loogu xirin wax sharuud ah, arrintu way iska caddayd, “ ayaa uu yiri wasiir hore, oo wasiirka gaashaandhigga ahaan jiray.[97] inta badan DFS waxa ay hubka fudud iyo rasaasta ay u baahantahay ka iibsataa “dalalka jaarka, kuwaas oo istaraatijiyad ahaan lid ku ah Soomaaliya,” ayaa uu intaa raaciyay wasiirku. Arrintani waxa ay muujinaysaa in ay dalalkaasi dano dhaqaale u soo dhawaysanayaan Soomaaliya, balse aanay kalgacal kale u haynnin.

# 8. Saamaynta qaska Al-Shabaab

Tan iyo 2006-dii, markii ay mallayshiyada al-Shabaab.[98] timid masraxa siyaasadda qaranka iyaga oo qayb ka ahaa Midowga Maxakamadaha Islaamiga ah, waxa ay ahaayeen kacdoonkii ugu argagaxa badnaa Afrika iyo ciidamadii ugu cabsida badnaa Soomaaliya. Afar maamul oo is ku xigay oo Soomaaliya.[99] ka hanaqaaday iyo AMISOM ayaa ku wada fashilmay in ay si micno leh u wiiqaan awoodda al-Shabaab, iskaba daa in ay gabi ahaan jabiyaane. Waxa yaab iyo fajiciso ah adkaysiga iyo dulqaadka [100] ay al-Shabaab, u leedahay weerarrada culus ee kaga yimaadda duqeymaha joogtada ah ee uu Mareykanku u gaysto, kuwaas oo mararka qaar la la beegsado madaxda[101] ugu sarraysa.

---

95 See “inspector general...” ibid, page 26.
96. Interview with former defense minister 2, ibid.
97 See “inspector general...” ibid, page 26.
Xog faahfaahsan oo ku saabsan isbeddelka al-Shabaab, fiiri “Qaab-dhismeedka al-Shabaab,” oo uu qoray Cabdi Caynte. (2010). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.scribd.com/doc/34053611/The-Anatomy-of-Al- Shabaab-by-Abdi-Aynte
99 Markii ay kooxdu soo baxday, waxaa madaxweyne ka ahaa marxuum Cabdullaahi Yuusuf. Tan iyo waqtigaas, madaxweynayaasha Shariif Shiikh axmed, Xasan Shiikh Maxamuud iyo Maxamed Cabdulaahi Farmaajo, dhamaantood way ku fashilmeen in ay ka adkaadaan al-Shabaab.
100 Eeg “Kormeeraha guud....” Ibid, bogga 12.
101 Alexander, D. “Mareykanka oo Xaqiijiyay Geerida Hogaamiyaha al-Shabaab Godane, Soomaaliya. Reuters. (2014). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.reuters.com/article/us-somalia-usa-islamist- idUSKBN0H01OO20140905

Jaahwareerka, tayooyinkaasi waxa ay udub dhexaad u yihiin fashilka joogtada ah ee soo nooleynta,"awoodda iyo isku waafaqsanaanta ciidamada," maxaa yeelay kooxdan xagjirka ahi, waxa ay si xeeladeysan uga faa'iideystaan maamul xumada joogtada ah ee DFS.
In kasta oo ay DFS halgan ugu jirto sidii ay u amri lahayd una maamuli lahayd wax ka yar 40,000 oo ciidamada[102] amniga ah, al-Shabaab waxa ay qaranka ku khalkhalisay ciidammo lagu qiyaasay 5,000-10,000 oo dagaalyahan.[103] Si kastaba ha ahaatee, kooxdani waxa ay ka hawlgashaa gobollada koonfurta iyo bartamaha ee Soomaaliya (waa meel kasta oo aan ka ahayn Somaliland iyo Puntland).[104] Xitaa Puntland, dowladda Islaamiga ah (IS), oo ah koox mitidiin ah, ayaa aad ugu firfircoon. Inkasta oo ay aad uga awood yar tahay al-Shabaab, hawlgalladeeda waxa ay ka fulisaa saldhigga ay ku leedahay buuraha Galgala, waxaana halkaa ku sugan ciidammo lagu qiyaasay 350 dagaalyahan,.[105] Marka laga yimaaddo in kooxdaas yar la barbardhigo awoodda Al-Shabaab, "kooxdu waxa ay ku sii socotaa hawlgal aan xad lahayn, gaar ahaan meelaha aan lahayn maamul dawladeed oo ku filan ama joogitaan ciidan."[106]

## 8.1 Cashuuraha adeegyada

*"Meelaha laga dheehan karo arxan la'aanta Al-Shaab ee qodan, waxa ka mid ah awoodda xafiisyadeeda, gaar ahaan garsoorka, oo dad badani u arkeen in ay tahay mid degdeg ah, oo caddaalad ah, horayna ka fula, marka la barbar dhigo maxakamadaha DFS iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah federaalka*

Meelaha laga dheehan karo arxan la'aanta Al-Shaab ee qodan, waxa ka mid ah awoodda xafiisyadeeda, gaar ahaan garsoorka, oo dad badani u arkeen in ay tahay mid degdeg ah, oo caddaalad ah, horayna ka fula, marka la barbar dhigo maxakamadaha DFS iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah federaalka.[107] DFS waxa ay qiraysaa in kooxdu ay ka faa'iideysaneyso "nusqaamaha nidaamka caddaaladda", Qiimayn heliseed wada jir ah, oo dhawaan la sameeyay, ayaa lagu iftiimiyey in " danaynta cadaaladdu ay tahay mid muhiim u ah qaab-dhismeedka nabadgalyada Soomaaliya, maxaa yeelay qaab-dhismeedka amniga iyo horumarinta maamulka maxalliga ah ayaa si weyn looga taageeray Soomaaliya, si dib loogu soo celiyo nidaam caddaaladeed oo tayo leh."[108]


Istaraatiijiyadda Xasilinta Qaranka (NSS), oo ay soo wada diyaariyeen DFS iyo dawlad-goboleedyadu, ayaa qireysa in  dawladda federaalka iyo maamul-gonoleeddaduba ka liitaan in laga helo caddaalad, waxa ayna xuseen in  dibuhabeynta caddaaladdu leedahay muhiimadda ugu weyn xasilinta.[109] Sida oo kale al-Shabaab waxa ay dhaqaale aad u badan ka soo saartaa lacagaha ay ka qaaddo muwaadiniinta doonaya in ay garsoor ka helaan maxakamadahooda, iyada oo ay kiisaska intooda badani ku lug leeyihiin khilaafaadka hantida, arrimaha guurka iyo dhaxalka.[110]  Arrimahan, intooda badani waxa ay la xiriiraan  khilaafka ka dhasha hantida dhaqaalaha badan, kuwaas oo ah ilaha dhaqaale ee ay al-Shabaab hawlgalladeeda ku fuliso.

---

102 Waxa ku jira Ciidamada Qaranka Soomaaliya,booliska and NISA.
103 DFS waxa ay ku qiyaastay 4,000-7,000 (Eeg JTA bogga 9) laakiin Mareykanku waxa uu ku qiyaasay in uu yahay 5,000-10,000 (eeg kormeeraha guud... bogga 15).
104 See, for example, https://acleddata.com/2020/01/15/acled-resources-al-shabaab-in-somalia-and-kenya/
105 Eeg JTA, ibid, bogga11
106 Eeg "Kormeeraha guud ..." ibid,bogga 13
107 Eeg "Dibudhiska Nidaamkii burburay ee Cadaaladda Soomaaliya ". Machadka Heritage. (2021). Halkan ka eeg: 108Eeg JTA, ibid, bogga 11.
109 Eeg " Istaraatiijiyadda Dibudhiska Qaranka: 2018-2020", bogga 4.
110 Eeg JTA, ibid, bogga 8.

“Cashuurta ay ururiso Al-Shabaab waxa sababay, ganacsatada ku sugan dalka badankiisa oo aan nabadgalydooda la ilaalinin

Daraasad u dhawaan sameeyey Machadka Hiraal, oo ah hay'ad cilmibaaris oo Soomaaliyeed, ayaa lagu ogaaday in ay kooxaha xagjirka ahi baad ka qaadaan dalka oo idil lacag u dhiganta ta dawladdu qaaddo, gaar ahaan magaalada Muqdisho." Cashuurta ay ururiso Al-Shabaab waxa sababay, ganacsatada ku sugan dalka badankiisa oo aan nabadgalydooda la ilaalinin. Hawl-wadeennada lacagaha khasabka ah uruuriyana waxa ay ka hawlgalaan dhammaan deegaannada Muqdisho, oo ay ku jiraan xaafadda ay ku taallo Madaxtooyada, Villa Somalia; Boosaaso badankeeda iyo Jawhar; iyo waliba Baydhabo iyo Kismaayo ah, "ayaa lagu yiri warbixinta. [111]




Sida oo kale waxa ay al-Shabaab cashuuro ka qaaddaa waxyaabaha laga soo dejiyo dekedda Muqdisho, taas oo ah isha koowaad ee dakhliga DFS. Al-Shabaab "waxa ay awood u leedahay in ay qiimeyso cashuuraha ku waajibaya ganacsiyada, maxaa yeelay shaqaalaha ka hawl gala dekedda ayaa al-Shabaab siiya xogaha alaabada soo degta. Xogtan oo faahfaahsan ayaa ay al-Shabaab heshaa, waxa aanay u adeegsataa in ay ku dalbato dhammaan lacagaha khasabka ah ee waxyaabaha la soo dejiyo. Ganacsatadu waxa ay si kalsooni leh u bixiyaan cashuuraha, maxaa yeelay waxa ay aaminaan in ay al-Shabaab oofinayaan dammaanad qaadkooda nabadgalyo iyo heshiiskooda, taas oo ah wax looga bartay; iyo in kuwa cashuurta bixiyaa ay xor u yihiin in ay tagaan meesha ay rabaan, halka kuwa cashuurta diidana laga ciqaabo oo naftooda khatar la geliyo."[112]

111 Eeg "Fashil halgan: La-dagaalanka Nidaamka Maaliyadeed ee al-Shabaab". Machadka Hiraal. (2020). bogga 2, waxa aad ka heli kartaa halkan: https://hiraalinstitute.org/wp-content/uploads/2020/10/A-Losing-Game.pdf
112 Ibid, bogga 3 and 4.


# 9. Saaxiibbada Caalamka

kooxo ka mid ah saaxiibbada Soomaaliya ee caalamiga ah ayaa ku hawlan qaybaha amniga Soomaaliya, iyada oo uu ujeedkoodu yahay in la abuuro jawi u suuragelinaya in ay DFS dib u qaaddo mas'uuliyadda amniga sida ugu dhaqsaha badan dhammaadka sannadka 2021.[113] Hase yeeshe, waxaa si aad ah u muuqata in bartilmaameedkani yahay mid aan macquul ahayn oo aan lagu guuleysan karin, sababta oo ah hab-dhaqanka saaxiibada dibedda oo ah, mid aan midaysnayn, is-barbar yaacna u badan, taas oo u qaabaysan rabitaan laba geesood ah, mid laga leeyahay dano juqraafi iyo mid lagula dagaallamayo argagixisada.



Hawl-galeenka ugu weyn fagaaraha amniga Soomaaliya waa AMISOM, oo in ka badan 20,000 oo askari ay ka joogaan dalka. In kasta oo uu waajibaadkooda koowaad yahay in ay DFS ka taageeraan nabadeynta iyo xasilinta dalka, haddana yoolka 14 jirka ah ayaa si muuqata u baahaya.[114]

### Halganka AMISOM ee 14 jirsaday




113 According to the Somali Transitional Plan (STP). See STP, page 10.
114 For a detailed treatment, please see Williams, P. and Hashi, A. "Exit Strategy Challenges for AU Mission in Somalia." Heritage Institute. (2016). Accessed at: http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2016/02/Exit-Strategy-Challenges-for-the-AU-Mission-in-Somalia.pdf

Khubaro badan ayaa rumeysan in ay hadda AMISOM bad-xiran ku jirto.[115] Wakhti xaadirkan, howlgalka AMISOM waxa uu leeyahay laba tiigsi oo si isbarkan isna xoojinaya: Ta koowaad, waxa ay ciidamada DFS ka taageeraysaa dhinaca la dagaallanka al-Shabaab iyo howlaha xasilinta, tan labaadna, waxa ay tababarro siinaysaa tiro badan oo ciidamada amniga ah. Nasiib darrose, sidii aynnu hore ba u soo sheegnay, labada dadaal midkoodna si fiican uma socdo. AMISOM waxa ay bilawday yaraynta ciidamadeeda markii ay 1,000 askari guryocelisay 2020, taas oo qayb ka ahayd istiraatiijiyaddeedda bixitaanka.

> *Sida tartanka qaawan ee ka dhacay Jubbaland uu daboolka ka qaaday, Nairobi iyo Addis Ababa ayaa u guntan sidii ay u fushan lahaayeen danahooda nabadgalyo ee gaarka u ah, iyaga ooaan ka gabbanayn in ay leexiyaan midnimda AMISOM si ay danahooda u fushadaan*

Saraakiisha Soomaaliya—kuwa hadda iyo kuwii hore ba—waxa ay hoosta ka xarriiqeen dhawr arrimood oo quseeya AMISOM. Ta kowaad, waa xaqiiqada ah in Kenya iyo Itoobiya—oo ah laba dal oo Soomaaliya col la ah -- ay qayb ka noqdaan hawlgalka nabad-ilaalinta Midowga Afrika, taas oo wali u muuqata xaqiiqa cabsi ku ah Soomaaliya. "Taliyeyaasha ciidamada ayaa mararka qaar amarro ka hela madaxdooda, taas oo mararka qaar caqabad ku ah howlgallada," ayaa uu yiri sarkaal sare oo la shaqeeya, kana tirsan DFS.[116] Sida tartanka qaawan ee ka dhacay Jubbaland uu daboolka ka qaaday, Nairobi iyo Addis Ababa ayaa u guntan sidii ay u fushan lahaayeen danahooda nabadgalyo ee gaarka u ah, iyaga ooaan ka gabbanayn in ay leexiyaan midnimda AMISOM si ay danahooda u fushadaan.[117] In kasta oo hub aanay ciidamada FDS siin, Kenya iyo Itoobiya ayaa meelo xuduudahooda ku dhaw si joogto ah ugu tababara, uguna qalabeeyaan ciidamada maamul goboleedyada.[118]

> *saraakiil sarsare oo ciidan ah ayaa si caro leh u xusay qarashaadka xad dhaafka ah ee ay saaxibbada Soomaaliya ku bixiyaan AMISOM119, iyada oo ay dhaqaale xumo ragaadisay ciidamada DFS*

Tan labaad, saraakiil sarsare oo ciidan ah ayaa si caro leh u xusay qarashaadka xad dhaafka ah ee ay saaxibbada Soomaaliya ku bixiyaan AMISOM[119], iyada oo ay dhaqaale xumo ragaadisay ciidamada DFS. Waxa ay farta ku fiiqeen waxa ay u arkaan cunu qabataynta ciidamada Soomaaliyeed iyo in aan horumar muuqda loo ogollayn ciidanka qaranka Soomaaliyeed. Waxaana ay shaki ka qabaan in ay dowladaha waaweyni ay wel-wel ka qabaan in ciidammo Soomaaliyeed oo awood badani ay keeni karaan khatar ku wajahan Itoobiya iyo Kenya oo ay dib u soo nooleynayaan mabaa'diidii xoraynta dhulka Soomaalida.[120] Inta badan saaxiibbada caalamiga ahi ma siiyaan Soomaaliya taageero hub oo macno leh, waa qodob ay AFRICOM ku iftiimisay warbixinta Pentagon: " "In kasta oo ay ciidamada amniga Soomaaliya ka faa'iideysteen tababbarkii ay siiyeen saaxiibbada caalamku, haddana dowladaha shisheeye ayaa inta badan ka cagajiida in ciidamadan la siiyo hub iyo qalab lagu horumariyo."[121] Waxaa jira sababo kala geddisan oo ay saaxiibbada Soomaaliya uga maagayaan in ay dalka siiyaan hub iyo rasaas. Qaar kale, sida Midowga Yurub, ayaan sharcigu u oggolayn bixinta hubka, laakiin siyaasadda cusub ee Midowga Yurub, ayaa hawlgalladeeda tababarrada u oggolaan doonta in ay ku bixiso taageero hubeed.[122]

115Waraysi laga qaaday wasiir hore oo gaashaandhig 2, ibid
116 Waraysi laga qaaday sarkaal hore oo gaashaandhig.
117Eeg "Dabadrgoynta Weerarrada Khatarta ah ..." ee ICG, bogga 9.
118Eeg "Siyaasadda Amniga ..." ee Keating iyo Abshir, bogga 7.
119Laga soo bilaabo 2007, Mareykanku waxa uu ku dhowaad 2 bilyan oo dollar ku bixiyay AMISOM. Eeg "Faham-ka Siyaasadda Mareykanka ee Soomaaliya" oo uu qoray Paul Williams for Chatham House. (2020). Page 12. Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.chathamhouse.org/2020/07/understanding-us-policy-somalia
120 Eeg "Dhisitaanka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya..", bogga 369.
121 Eeg "Kormeeraha guud..." ibid, bogga 22.
122 Eeg "EUTM...", bogga 7.

Maqnaansha  ciidammo leh awood xooggan ayaa dhibaato iyo murugo ku ah saraakiisha DFS ee weli ku baaqaya in gebi ahaanba laga qaado cunaqabateynta hubka ee ay Qaramada Midoobey saartay Soomaaliya sannadkii 1992, taas oo qeyb ahaan laga qaaday 2013.[123]

> *Abu Dabi ayaa weli sii wadda taageerada ay siinayso boolis-ka  badda ee Puntland, oo markii hore loo asaasay hawlgal ka dhan ah burcad-badeedda, laakiin gadaal ku dhex milantay ajandayaal amni iyo kuwo ganacsiga ee ay Imaaraadka Carabtu ka wadaan Geeska Afrika*

Saaxiibbada kale ayaa qiraya in aanay taageeradoodu  gabi ahaanba ku salaysnayn arrin istiraatiijiyadeed. Dib-u-eegis dhawaan lagu sameeyay howlgalka tababarka Midowga Yurub, ayaa lagu ogaaday in "ay ku qasbanaadeen in ay hirgeliyeen hawl farsamo iyo tababarro in kasta oo ay muuqatey in aan siyaasadaha ku harraysan amniga Soomaaliya in aanay u diyaarsanayn in la dhiso ciidammo qaran oo xirfad leh."[124] Sida oo kale Imaaraadku waxa ay tababaro siinayen ciidamada ammaanka  ee Soomaaliya muddo ku dhow toban sano, waxaana suuragal ah in ay ka qalin jabiyeen ilaa 10,000 oo askari,  kuwaas oo koorsooyinka ku qaatay Muqdisho iyo Puntland.[125] In kasta oo ay xirtay xarunteedii tababarka ee Muqdisho ka dib khilaaf soo kala dhex galay DFS, Abu Dabi ayaa weli sii wadda taageerada ay siinayso boolis-ka  badda ee Puntland, oo markii hore loo asaasay hawlgal ka dhan ah burcad-badeedda, laakiin gadaal ku dhex milantay ajandayaal amni iyo kuwo ganacsiga ee ay Imaaraadka Carabtu ka wadaan Geeska Afrika.[126] Tababarka is-barbar socda ee ay bixiyaan waddamada Carabta iyo kuwa jaarka ahi, waxa ay sii kala daadin karaan  ciidamada ammaanka Soomaaliya, sida ay xustay ICG: "Khatarta kooxaysiga ayaa walwal weyn abuuraya marka loo eego fadhiidnimada durba  heertay ciidamada amniga Soomaaliya." [127]

## 9.1 Erateriya: Haddaan kooye?

Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, Erateriya waxa ay ku soo biirtay liiska sii kordhaya ee dawladaha saaxiibka la ah Soomaaliya, iyada oo ciidammo u tababarta dowladda Soomaaliya. Sida lagu sheegay baaritaan ay sameysay idaacadda VOA, ciidamada Soomaaliya ee ku tababarta dalka Erateriya waxa ay tiradoodu u dhexeeysaa 3,000 ilaa 7,000 oo askari.[128]  Inkasta oo aanay DFS waligeed xaqiijin in ay  Asmara ku soo tababaranayaan ciidammo Soomaaliyeed, haddana waxa jira eedeymo sheegaya in qaar ka mid ah ciidamadaasi ka qaybgaleen dagaalka ka socda dhulka Tigrayga ee woqooyiga Itoobiya.[129]

Qaramada Midoobay, ayaa dhawr sano ka hor, Ereteriya cunaqabatayn ku saaray doorkii ay ku laheyd hubeynta al-Shabaab iyo ka qeyb qaadashada xasilooni darrada Soomaaliya.

---

123 Mukami, M. iyo Dhaysane, M. "Soomaaliya waxa ay cabanaysaa 'Waqti' laga qaaday Cunaqabateynta Hubka ee UN". Anadolu Agency. (2019). Halkan ka eeg: https://www.aa.com.tr/en/africa/somalia-protests-outdated-un- arms-embargo/1648236
124 See "EUTM training...", page 14.
125 Eeg "Soomaaliya iyo Xiisadda ka taagan gacanka-Suways, bogga 12.
126 Ibid.
127Eeg "Soomaaliya iyo xiisadda ka taagan gacanka-Suways , bogga 11.
128 Harun Macruuf. "Tababar Qarsoodi ah oo dalka Ereteriya lagu soo tababarayo ciidamada Soomaaliya,ayay walaac ka dad badani . " (2021). VOA News. Waxa aad ka helikartaa halkan: https://www.voanews.com/africa/clandestine-training-somali-forces-eritrea-stirs-families-concern
129 ibid

Ka dib markii 2018 la gaaray xiriirka taariikhiga ah ee u dhaxeeya Itoobiya iyo Erateriya, dowladda Soomaaliya oo ay weheliso Itoobiya ayaa Erateriya u doodday si looga qaado cunaqabateynta saaran. Wax yar uun ka dibna, madaxweyne Farmaajo waxa uu ku xirmay raysalwasaaraha Itoobiya Abiy Ahmed iyo madaxweynaha Ereteriya Isaias Afwerki, iyaga oo samaystay  xiriir saddex-geesood ah uu u dhaxeeya saddexdaas hoggaamiye ee Geeska Afrika.[130]

Tababarka ay Ereteriya siinayso  ciidamada Soomaaliya ayaa muran weyn ka dhex dhaliyay dadka Soomaaliyeed.  Hoggaamiyeyaasha mucaaradka iyo qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah federaalka, ayaa arrintan ku sheegay tusaale cad oo tilmaamaya 'kalitalisnimada' madaxweyne Farmaajo. Qaar ka mid ah saaxiibbada caalamka ayaa iyaguna sida oo kale aad uga xun heshiiskan, iyaga oo u arka in ay Ereteriya  xasillooni darro ka waddo Geeska Afrika.

## 9.2  Turkiga iyo Mareykanka: Saaxiibbada ugu wanaagsan.

> "Ilaa hadda, Turkigu waa dalka ciidamada ugu tirada badan  u tababara, una qalabeeya Soomaaliya marka la barbar dhigo dalalka kale

Dalalka ajnabiga ah ee taageera ciidamada ammaanka Soomaaliya, Turkiga iyo Mareykanka ayey ka go'an tahay in ay bixiyaan barnaamijyo wax ku ool ah iyo tababarro dhameystiran oo guuleysta. [131] Sababtuna waa in ay yihiin labada kaliya ee si nidaamsan u fulinaya hannaanka  shanta tallaabo, oo lagama maar maan u ah, in la dhiso ciidan amni oo wax ku ool ah. [132]  Midowga Yurub iyo Boqortooyada Ingiriiska, ayaa sida oo kale gacan weyn ka gaysta sidii ay hannaanka tababarka ee ciidamada Soomaaliya, uga soo rari lahaayeen qaabkii xilligii Midowga Soofiyeeti, ugana dhigi lahaayeen nidaamka NATO. [133]  Turkiga, oo la oran karo waa jilaaga ugu caansan Soomaaliya, waxa uu dhisay xarun tababar oo ku kacday 50 milyan  oo doollar, kuna taalla dusha sare ee caasimadda, taas oo qayb ka ah deeqaha ballaaran ee uu bixiyo.[134] Ilaa hadda, Turkigu waa dalka ciidamada ugu tirada badan  u tababara, una qalabeeya Soomaaliya marka la barbar dhigo dalalka kale. Ciidamada ammaanka ee Soomaaliya, ku dhowaad boqolkiiba toban ayaa lagu tababaray "TurkSom", oo ah xarunta tababarka ee magaalada Muqdisho, taas oo ka dhigaysa in Turkigu yahay ka-qayb-qaataha ugu muhiimsan ee arrimaha.[135]

Qaar ka mid ah ciidamada ugu cadcad DFS, sida Gorgor iyo Harimacad, ayaa uu Turkigu tababaray, saraakiishooda sarsare na waxa tababarro takhasus ah loogu diraaTurkiga. Ciidamada uu Turkigu tababaro waxa uu siiyaa hub iyo saanad, bilihii la soo dhaafayna, waxa uu siiyay baabuur gaashaaman.[136]

---

130 Eeg "Hoggaamiyeyaasha Ereteriya, Itoobiya iyo Soomaaliya oo yeeshay xidhiidh qotodheer."xidhiidh." (2020). Xinhua. Waxa aad ka heli kartaa halkan: http://www.xinhuanet.com/english/2020-01/28/c_138737839.htm

131Ibid. Shanta tallaabo waa: (b) qiimeynta ujeeddada qorshaysa ee howlgalka, miisaaniyada la hayo iyo tirada iyo noocyada shaqaalaha ee loo baahan yahay; (t) xulashada dadka la tababarayo; (j) tababarka tababarayaasha oo heer sarreeya; (d) u qalabeynta ardayda in ay si hufan uga shaqeeyaan goobta; iyo (e) kormeerayaa la socda fiilasha hawlgallada.

132 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo gaashaandhigga federaalka ah

133 Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hawlaha uu Turkigu ka wado Soomaaliya, tusaalahan eeg, , "Qaabka Caawinta Turkiga ee Soomaaliya." Machadka Heritage. (2016). Waxa aad ka heli kartaa halkan: http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2016/02/Turkeys-Assistance-Model-in-Somalia-Achieving- Much-With-Little1-1.pdf

134: http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2016/02/Turkeys-Assistance-Model-in-Somalia- Achieving-Much-With-Little1-1.pdf

135 Ilhan, Z. iyo Demirci, Z. " seddexdiiba hal ayaa uu Ciidanka Soomaaliya uu tababaray Turkigu: Ergay". Wakaalada Anadolu. (2020).Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.aa.com.tr/en/africa/1-of-3-somalian- troops-to-be-trained-by-turkey-envoy/1931275

136 Dhaysane, M. "Turkiga waxa uu ugu deeqay Soomaaliya 12 gaari oo gaashaaman." Wakaalada Anadolu. (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.aa.com.tr/en/turkey/turkey-donates-12-military-vehicles-to- somalia/1955609

Saraakiil hore iyo kuwa hadda ee DFS oo lagu wareystay warbixintan, ayaa aad uga hadlay in Turkigu "aanu ku dhex milmin is-qab-qabsiga siyaasiyiinta Soomaaliya, isla markaana uu Soomaaliya si joogto ah u siiyo taageero la isku hallayn karo oo istiraatiiji ah".[137] Bishii Diseembar 2020, isbahaysi ay ka mid yihiin in ka badan toban murashax oo madaxweyneyaal u taagan, ayaa ugu baaqay Turkiga in uu joojiyo hubeynta Harimacad, oo ah boolis harmuud ah oo Ankara lagu soo tababaray, iyaga oo ku andacoonaya in uu madaxweyne Farmaajo u adeegsanayo in uu "ku afduubto" doorashooyinka.[138] Waa markii ugu horraysay ee haldoorka siyaasiyiinta Soomaaliya ay Turkiga canbaareeyaan, tan iyo markii ay Ankara 2011 noqotay mid kaalin firfircoon ka ciyaarta arrimaha ciidamada Soomaaliya.

Marka laga yimaado dalka Turkiga, doorka dawladda Maraykanka ee dhinaca amniga Soomaaliya ayaa u muuqdaa mid yididiilo leh, sida ay sheegeen qaar ka mid ah masuuliyiinta xilka haya iyo qaar hore, iyo waliba khuburo kale oo badani. Inkasta oo go'aanka maamulka Madaxweyne Trump ee uu ku dhawaad 700 oo ka mid ah ciidamadiisa uu ugala baxayo Soomaaliya ay arrintaas xagal daacin karto.[139] Dawladda Maraykanku waxa ay door muuqda kaga jirtaa dadaalada lagu wiiqayo ururka Al Shabaab. Dawladda Maraykanku waxa ay sida oo kale qalabaysay Guutada Danab, oo ilaa hadda loo arko in ay yihiin guutadan ugu awoodda badan guud ahaan laamaha amniga dalka. Si ka duwan dalalka kale, ee ciidamada u tababara Soomaaliya oo arrintoodu ku salaysan tahay nidaamka,"Tababar oo faraha ka qaad", Maraykanku Guutada Danab oo uu tababaray ayaa uu gacanta ku hayaa waxa aanay joogaan goobaha dagaalka.

Inkasta oo heshiiskii London ee lagu go'aamiyay in lagu dhiso 3,000 oo askari oo guutooyinka Danab ah (500 oo askari dawlad-goboleed kasta), AFRICOM waxa ay sheegtay in Guutada Danab ay ilaa hadda (2020) ka koobanyihiin 945 askari.[140] Waxa iyaduna mudan in la xuso, Danab waxa ay masuul ka yihiin 80% hawlagallada ay fuliyaan Ciidamada Qaranka ee Soomaaliya iyo ku dhawaad dhammaan, hawlagallada la dagaallanka argagixisada.[141]

---

137 Sheikh, A. "Mucaaradka Soomaaliya ayaa Turkiga ka codsaday in aanu in aanu hubayninn qeybta booliska". (2020). Waxa aad ka heli kartaa halkan https://www.reuters.com/article/us-somalia-politics/somalias-opposition-urges-turkey-not-to-send-arms-to-police-unit-idUSKBN28Q29G
138 Cooper, H. "Trump waxa uu ku Amray in Dhammaan Ciidamada Mareykanka ee jooga Soomaaliya ka soo baxaan." New York Times. (2020).Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.nytimes.com/2020/12/04/world/africa/trump-somalia-troop- withdrawal.html?action=click&module=Top%20Stories&pgtype=Homepage
139 Cooper, H. "Trump waxa uu ku Amray in Dhammaan Ciidamada Mareykanka ee jooga Soomaaliya ka soo baxaan." New York Times. (2020).Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://www.nytimes.com/2020/12/04/world/africa/trump-somalia-troop- withdrawal.html?action=click&module=Top%20Stories&pgtype=Homepage
140 See "Tababarrada EUTM ...",bogga 11.
141 Ibid, bogga 20.

## Guutada Danab iyo ka dib marka uu Maraykanku dalka ka baxo

Masuuliyiinta Soomaaliya iyo khubaraduba waxa ay ka warwarsan yihiin mustaqbalka ciidamada Danab, kaddib marka ay ciidamada Maraykanku ka baxaan Soomaaliya horraanta 2021. Dawladda Maraykanku si weyn u maalgalisay dhismaha iyo qalabaynta ciidamada Danab, oo la dhisay muddo haatan laga joogo ilaa toban sanno. Laakiin badbaadada guutadu waxa ay gebi ahaanba ku tiirsan tahay sii wadidda taageerada Mareykanka. Dad badan ayaa walaac xooggan ka qaba sii jiritaanka Danab, waa haddii ay waayaan taageerada dhaqaale iyo ta tababarka ay siinayaan ciidamada Maraykanku. Masuul sare oo ka tirsan dawladda Soomaaliya ayaa sheegay in ay ka fikirayaan sidii loo hirgelin lahaa qorshe adag oo saldhig u ah sii jiritaanka Danab.[142] Si kastaba ha ahaatee, waxa iyadana warwar laga qabaa in dawladda Soomaaliya ay u adeegsato ciidamada Danab ujeeddooyin Siyaasadeed, si la mid ah guutooyinka kale ee Turkigu tababaray ee Gorgor iyo Harimacad.[143]

Intii hore oo dhan, dawladda Maraykanku marna may ogolaannin in la siyaasadeeyo ciidamada Danab, balse hal dhacdo ayaa walaac cusub abuurtay. Maalmo yar ka dib markii xilka laga qaaday Raysalwasaarihii hore ee Soomaaliya Md. Xassan Cali Khayre bishii Julay, 2020, dawladda Soomaliya waxa ay xirtay Taliyihii Ciidamada Danab Ismaaciil Cabdimaalik Maalin, kaas oo ay isku jufo yihiin Raysalwasaaraha xilka laga qaaday. Maadaama bulshada Soomaaliyeed ay nimaadka beelaha u dhisan yihiin, waxa markiiba arrintaas cambaareeyey odayaasha beesha Murusade oo ku tilmaamay in ay tahay “tallaabo dano siyaasadeed laga leeyahay”.[144]

Bishii Diisember 2020, ayay dawladda Soomaaliya xabsiga ka sii daysay Ismaaciil Cabdimaalik Maalin, waxaanay meesha ka saartay dhammaan eedeymihii lagu soo oogay oo dhan. Iyada oo ay sababuhu intaa ka badnan karaan, shaki kuma jiro in bixitaanka ciidamada Maraykanka ee Soomaaliya ay abuuri doonto walaac la xiriira in Maraykanka loo arko saaxiib aan laysku hallayn karin. Dhaliilaha arrintaas ku saabsan sida tan uu qabo Tommy Ross in badan baa lagu doodaayay in taageerada Maraykanku ay inta badan tahay mid “xaddidan oo aan laysku hallayn karin,” oo inta badan la xiriirta “arrimo goonni ah, iyo in inta badan uu bartilmaameedsado dhaqdhaqaayada Argagixiso iyo fulinta hawlgallada arrintaas la xiriirta .” [145]

*“Khubaradu waxa ay hoosta ka xariiqeen muhiimadda ay leedahay baahida loo qabo in si xilkasnimo leh loo maamulo dhinacyada kala duwan ee ku lug leh laamaha nabadgalyada dalka*

Khubaradu waxa ay hoosta ka xariiqeen muhiimadda ay leedahay baahida loo qabo in si xilkasnimo leh loo maamulo dhinacyada kala duwan ee ku lug leh laamaha nabadgalyada dalka.[146] Waxa muuqata in ay dawladda Soomaaliya culaysyo kala kulmayso sidii la isu waajafin lahaa baahida weyn ee ay u qabo taageero dhinaca amniga ah iyo is-barbar yaaca ka jira hannaanka taageeradaas. Sidaa daraadeed, dawladda Soomaaliya iyo beesha Caalamkaba waxay qalbiga ku qabowsan karaan, ka dib 15 sanno oo la dhisayey ciidamada kala duwan ee Soomaaliya, in khubarada madaxa bannaani ay aaminsan yihiin in Al-Shabaab aanay halis ku ahayn sii jiritaanka dawladda Soomaaliya.[147]

142 Waraysi laga qaaday sarkaal sare oo gaashaandhiga faderaalka ka tirsan
143 Waraysi laga qaaday wasiir hore oo gaashaandhig 2 .
144 Daawo shir jaraa'id oo ay qabteen odayaal sheeganaya in ay xiriir la leeyihiin taliye Macalin:https://www.youtube.com/watch?v=MYYdeomjwr8
145 Ross, T. “Khataraha aan lahayn Istaraatiijiyad xidhiidhsan: Caawinta Amniga ee Soomaaliya: 2008-2018”. Dibu- eegista cashuurta Amniga Qaranka. (2019). Waxa aad ka heli kartaa halkan: https://tnsr.org/roundtable/policy- roundtable-the-pros-and-cons-of-security-assistance/#essay3
146 See “The Security Sector Reform...”, page 3.
147 Eeg “Kormeeraha guud...”, bogga 13.

# 10. Gunaanad

Saaxiibbada caalamku waxa ay ciidamada Soomaaliya siiyaan tageero dhaqaale oo wax ku ool ah iyo taakulooyin kale si ay dib loogu soo nooleeyo hay'adaha amniga ee gabbalku u dumay. Dedaalkooda waxaa is hor taagay arrimo is biirsaday, gaar ahaan markii ay hormuudka siyaasadda Soomaaliya ku guuldareysteen in ay heshiis weyn ka gaaraan arrimaha muhiimka ah ee la xariira qaab-dhismeed nidaamka amniga ee federaalka, gaaar ahaan kuwa la xiriira  awood-qaybsiga iyo wadaagga kheyraadka. Kalsooni darrada waxaa sii xoojiyay dhacdooyinkii dhawaanahan ka dhacay Gedo, ee lagu geeyay ciidamada  gaar ah ee uu Turkigu tababaray. Arrintan ayaa salka ku haysa khilaafka siyaasadeed ee ka jira gobolka Gedo ee dowlad-goboleedka Jubbaland. khilaaf kale oo siyaasadeed ayaa isna hadda ka soo cusboonaaday Hirshabeelle.

*"Siyaasadeynta ciidamada amniga qaranka ayaa ah qodobka ugu halista badan ee sii xoojiyay maamul xumada baahsan ee heysata hay'adaha dowladda: heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ba*

Siyaasadeynta ciidamada amniga qaranka ayaa ah qodobka ugu halista badan ee sii xoojiyay maamul xumada baahsan ee heysata hay'adaha dowladda: heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ba. In kasta oo dedaallo aad u wanaagsan laga sameeyay la dagaallanka musuqmaasuqa, gaar ahaan marka ay joogto waxa loogu yeero 'askarta caaglaha ah,' haddana qaraabo kiilku waa dhibaato joogto ah. Saraakiisha yaryar waxaa si joogto ah loogu dalacsiiyaa guulwadayn iyo sababo qabiil. Tani waxa ay baabi'ineysaa  niyadsamida ciidamada amniga, waxa aanay ku tirtir-siinaysaa in ay ciidamadu daacad u noqdaan qabiilladooda- Waa isla bartii laga qaniinay ciidamada amniga Soomaaliya 30 sano ka hor!

Dhaqaale xumada daba-dheeraatay ayaa ah qodob weyn oo kale, kaas oo caqabad ku ah soo nooleynta ciidamada amniga Soomaaliya. Liidashada soo saarista dakhliga ayaa DFS ku qasbeysa in ay si weyn ugu tiirsanaato taageero-maaliyadeed, si ay u ugu maamusho ciidamadeeda ammaanka oo qiyaastii ah 40,000 oo askari.  Saameynta ugu weyn waxa ku leh xaddiga tirada ciidamada askarinimada ka tagaya oo sarreeya iyo ka ciidamada la qaadanayo oo hooseeya.  Dawlado badan oo shisheeye, oo DFS ka taageera  arrimaha ciidamada ayaa  caan ku is-barbar yaac, qaarkoodna, sida Kenya iyo Itoobiya, waxa ay ku fushadaan danahooda qaran, iyaga oo wax u dhimaya xasiloonida mustaqbalka fog ee Soomaaliya. Kuwa kale oo badan ayaa iyaguna tababaraya oo soo saaraya ciidammmo bilaa hub iyo saanad ah, iyaga oo abuuraya askar badan oo aan hubaysnayn. Mareykanka iyo Turkiga ayaa  tusaaleyaasha ugu mudan u ah barnaamijyada "tababar oo gaacan ku hayda " guuleystay. Sidaas darteed, Guutada uu tababaray Mareykanka ee Danab waxa ay fulisaa boqolkiiba 80 hawlgallada khatarta ah iyo dhammaan hawlgallada la dagaallanka argagixisada. Guutooyinka uu tababaray Turkigu, ee Gorgor iyo Haramacad ayaa sida oo kale ku guuleysta howlgallada ay fuliyaan. In kasta oo ay sannadahan danbe sumcaddooda wiiqday ku lug lahaanshahooda khilaafaadka salka ku haya siyaasaddu.

Dhanka kale, kooxda xagjirka ah ee Al-Shabaab waxa ay sii waddaa carqaladeynta horumarka iyo in ay ka faa'iideystaan maamul xumada iyo dib-u-heshiisiin la'aanta siyaasadda. Duqeymaha cirka ee Mareykanka iyo howlgalladii ugu dambeeyay, sida Badbaado 1 ayaa kooxda ku qasbay in ay aad ugu sii muquuraan dhulka hoostiisa. Marka taas laga yimaaddo, waxa ay ka helaan dakhli aad u badan oo la mid ah ka ay dowladdu ka hesho magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho iyo Kismaayo. Si kastaba ha noqotee, khatar dabo-dheeraata kuma sii yeelan doonaan DFS. Jidadka wada hadallada suuragalka ah ayaa u muuqda kuwa xirmay, ilaa laga gaaro ka dib doorashada madaxweynaha ee horraanta 2021.

# 11. Talobixinta

Caqabadaha laanta amniga ee Soomaaliya ka haysta dhinaca dibu-dhisku, waxa ay u muuqdaan hawlo aad u adag oo cabsi leh, balse hoggaan ay ka go'an tahay ayuun baa caqabadahaas ka tallaabsan kara, waa haddii ay tallaabooyinka soo socda qaadaan saammilayda siyaasadda ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, marka la galo doorashooyinka federaalka kaddib:

Ugu horreyn, hoggaamiyeyaasha DFS iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah federaalku, waxa ay u baahan yihiin in ay ku noqdaan Haykalkii Amniga Qaranka ee London, oo ahaa qaab wadashaqay-need oo kumeel-gaar ah, kaas oo leh qaab-dhismeedka aasaasiga ah ee amniga Qaranka. Si arrintan loo fuliyo, waa in DFS iyo dawaladaha xubnaha ka ah federaalka ( saraakiishooda sarsare) ay si deg-deg ah wada hadal uga furaan qaab-dhismeedka ciidanka amni qaranka, iyada oo looga golleeyahay in lagu dardargeliyo wax ka qabashada qalalaasaha ka taagan Gedo iyo Hiiraan, dibna loogu noqdo mabaadi'dii heshiiska London. Intaas waxaa sii dheer, hoggaamiyayaashu waa in ay u guntadaan in aanay siyaasadayn ciidamada ammaanka inta lagu guda jiro (iyo kadibba) doorashada federaalka, iyada oo la raacayo qodobka 127 ee dastuurka ku-meelgaarka ah. Siyaasad dhex-gelinta ciidamada amniga ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ayaa saameynta ugu badan ee aan wanaagsanayn ku leh dib-u-dhiska ciidammo amni oo waara, kuwaas oo leh karti, isla xisaabtan iyo isla waafaqitaan.

Tan labaad, iyada oo lagu salaynayo qaab-dhismeedka ciidamada nabadgalyada qaranka, waa in ay hogaamiyeyaasha DFS iyo dawlad-goboleedyadu aasaasaan gudidda amniga qaranka, sida ku cad qodobka 111G ee dastuurka ku meelgaarka ah. Golahani waa in uu noqdaa gole si joogto ah u beddela Golaha Amniga Qaranka, waana in uu awood u leeyahay in uu dejiyo tilmaamo siyaasadeed oo ballaaran, si uu khilaafka uga dhex saaro laanta amniga iyo federaalka Soomaaliya.

Tan saddexaad, DFS waa in ay si dhakhso ah u hirgelisaa siyaasaddii ugu dambeysay ee ku saabsanayd dallacsiinta iyo darajooyinka hay'adaha amniga, iyada oo la raacayo qodobka 111G ee dastuurka kumeelgaarka ah. Aarrintani waxa ay adkaynaysaa in aanay siyaasiyiintu ku dhiirran dallacsiinta ku saleysan madax-u-daacadnimada ama qaraabo kiilka. Waxa ay sida oo kale u horseedi lahayd in la aqoomeeyo, lana hay'adeeyo haykalka hay'adaha amniga.

Tan afraad, waa in madaxda DFS iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah federaalka ay ka wada doodaan, iskagana tanaasulaan 15 ka qodob ee ugu mudan dib-u-eegista dastuurka ku-meel-gaarka ah. Loolanka muddada-dheer joogtada noqday ee arrimaha dastuurka Soomaaliya ayaa ah qodob muhiim u ah dhammaan tartannada siyaasadeed ee Soomaaliya. Xitaa haddii dhinacyada iska soo horjeedaa aanay dhameystiri karin doodaha ku saabsan dhammaan 15-ka qodob inta lagu guda jiro wareegan doorasho, ugu yaraan waa in ay ku heshiiyaan kuwa fudud oo leh soo jiidasho waddaninimo.

Hoggaamiyeyaasha DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka oo ay weheliyaan Golaha Amniga Qaranku, waa in ay si xeeldheer dib ugu eegaan sii joogitaanka ciidamada Itoobiya iyo Kenya ee Soomaaliya, oo haddii isla qaataan in aanay Soomaaliya ka taageerayn dadaalka dhabta ah ee ay ugu jirto in ay ku soo noolayso ciidankii qaran, waa in ay go'aamiyaan in ay dalka isaga baxaan labadaas ciidan ee Kenya iyo Itoobiya. Waxaa jira caddeymo tiro beelay oo taageeraya ujeeddooyinka gurracan ee deriskeenna. Si kastaba ha noqotee, DFS waa in ay labada dal kula dhaqantaa xiriir derisnimo oo wanaagsan.

Tan shanaad, Maraykanku waa in uu si dhab ah uga fiirsadaa la bixitaanka ciidamadiisa ka jooga Soomaaliya. Madaxweyanaha Maraykanka Joe Biden waxa uu ahaa madaxweyne ku xigeen markii ciidamadan Soomaaliya la keenay. Saraakiishiisuna badanaa waa ay fahansan yihiin muhiimadda istatijiyadeed ee ay sii joogitaanka ciidanka Maraykanku u leeyihiin sii jiritaanka xasiloonida iyo nabadgalyada Soomaaliya. Maalgashiga la geliyay Guutada Danab, ma mudna in la khasaariyo.

Lixaad, waa in ay hoggaamiyeyaasha DFS iyo dawlad-goboleedyadu(doorashada kaddib), dib-u-eegis ku sameeyaan kaalinta ay ku leeyihiin dawladaha shisheeye dib-u-dhiska awoodda ciidamada Soomaaliya. Gudaha Golaha Amniga Qaranku, waa in lagu tashado, laguna dedaalo sidii loo soo afjari lahaa tababarrada is-bar-bar yaaca ah ee ay ciidamada Soomaaliya siiyaan daneeyashaasha caalamku. Guddida amniga qaranka ee Soomaaliya waa in ay sidoo kale dib-u-eegis ku sameeyaan sii joogitaanka ciidamada Itoobiya iyo kuwa Kenya ee Soomaaliya. Haddii la isku waafaqo in aanay dalalkaasi ka qayb qaadanaynin dadaalka loogu jiro dib-u-dhiska ciidamada qaranka Soomaaliyeed, waa in lagu amraa in ay degdeg dalka uga baxaan. Waxaa jira caddeymo badan oo shaaca ka qaadaya ujeeddooyinka gurracan ee dawladaha deriska ah. Si kastaba ha ahaatee, waa in ay DFS wanaajiso xiriirka dublimaasiyadeed ee ay la leedahay labada dawladood ee dariska ah.

HERITAGE
INSTITUTE